report

minority rights group international

# Daawo La'aanta: Beelaha laga tirada Badan yahay Soomaaliya ee La Illaawey

Qoraaga Martin Hill



**Inan Bantu ah ee joogto gudaha gurigeeda, Mudug, Puntland**. Petterik Wiggers/Panos

**Mahadcelin**
Warbixintan waxay qayb ka tahay mashruuc MRG oo lagu rabo in lagu sugo nabadgalyada beelah laga tirade badan yahay ee nuglan ee Soomaaliya iyo in lagu abaabulo xorriyaddooda aasaasiga ah, kaasoo ay maalgeliyeen Midowga Yurub (European Union) oo adeegsanaya Nidaamka Yurub ee Dimoqraadiyadda iyo Xuquuqda Insaanka (European Instrument for Democracy and Human Rights), iyo hay'adda Caawimaadda ee Ayrland (Irish Aid). Ujeeddada mashruucu waxay tahay in la kordhiyo kartida dabagalka iyo qareenimada ee ururrada mujtamaca raydka ah iyo dadka u halgama xuquuqda insaanka ee Soomaaliya kuwaasoo iyagu beelaha laga tirada badan yahay u dooda, iyo in la abaabulo ka qaybgalkooda dadweynaha haddii ay tahay heerka xaafadeed, qaran iyo caalamkaba. Qoraallada ku jira warbixintan waxaa ka masuul ah oo keliya MRG, oo marna looma arki karo in ay ka turjumayaan fikradda Midowga Yurub ama hay'adda Irish Aid.

Ururka dalka gudihiisa ka matalaya MRG ama wada shaqeeyaan waa Dalada Gargaarka iyo xuquuqda dadka laga tirada badan yahay ee SOMRAF (Somali Minority Rights and Aid Forum) (SOMRAF), kaasoo ah urur aanan macaash ku shaqaynin oo u dadaala xuquuqda insaanka, caawimaadda iyo horumarka Soomaaliyeed isagoo saldhiggiisu yahay Nairobi xarumana ku leh Soomaaliya, Soomaaliland, Jabuuti iyo Itoobiya.

Hawsha soo ururinta macluumaadka loo adeegsaday warbixinta waxaa qabtay laba xirfadleyaal cilmibaaris oo Soomaali ah oo iyagu jooga Nairobi, Kenya – Ahmed Osman Ibrahim (cilmibaaraha sare), oo agaasime hore ugu ahaa barnaamijka Soomaaliya ay ka waddo hay'adda caawimaadda ee ActionAid, iyo Mariam Yassin Hagi Yussuf-Jirde, Agaasimaha Guud (Executive Director) ee ururka aanan dawli ahayn (NGO) ee Soomaaliyeed ee la yiraahdo IIDA Ururka Horumarinta Haweenka (Women's Development Organization) (cilmibaarto). Ururka MRG waxuu aqoonsan yahay gargaarka daruuriga ah ee ay iyagu warbixintan ka dhiibteen. Waxaa weliba loo mahadcelinayaa Murtaza Shaikh Sarkaalka Sharciyeed iyo Siyaasiyeed (Legal and Political Officer) ee Hindisaha Ka hortagga Colaadda ee loo adeegsado Diblomaasiyadda Dahsoon (Initiative on Conflict Prevention through Quiet Diplomacy) (ICPQD) ee jaamacadda University of Essex.

Ururka MRG waxuu ka mahadcelinayaa wadashaqaynta iyo xiisaynta laga helay ururro iyo shakhsiyaad tiro badan oo caalami ama Soomaali ah iyaga oo lagala tashaday warbixintan ama loo waraystay, iyo gaar ahaan ururrada beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliyeed iyo dadkii la waraystay ee ka soo jeeda beelaha laga tirada badan yahay.

Tafatiraha Xilsaaran iyo Isuduwaha Mashruuca (Commissioning Editor and Project Coordinator): Marusca Perazzi. Tafatiraha Warbixinta (Report Editor): Helen Kinsella. Isuduwaha Soosaarka (Production coordinator): Kristen Harrison. (Typesetting): Kavita Graphics.

**Qoraaga**
Martin Hill waa lataliye madaxbannaan. Waxuu haystaa shahaadada ugu sarraysa jaamacadda ee PhD oo uu u haysto Cilmiga barashada Dadka iyo dhaqamadooda (Social Anthropology) iyadoo uu ka helay jaamacadda dhaqaalaha ee London School of Economics. Hay'adda xuquuqda insaanka ee Amnesty International ayuu u ahaa Cilmibaaraha Geeska Afrika (Researcher on the Horn of Africa) laga bilaabo 1976kii ilaa 2008dii, waxuuna dhowr sanadood Xubin Guurto ah (Visiting Fellow) ka ahaa Machadka Cilmibaarista Barwaaqosooranka (Institute of Commonwealth Studies), jaamacadda University of London.

**Minority Rights Group International**
Minority Rights Group International (MRG) is a nongovernmental organization (NGO) working to secure the rights of ethnic, religious and linguistic minorities and indigenous peoples worldwide, and to promote cooperation and understanding between communities. Our activities are focused on international advocacy, training, publishing and outreach. We are guided by the needs expressed by our worldwide partner network of organizations, which represent minority and indigenous peoples.

MRG works with over 150 organizations in nearly 50 countries. Our governing Council, which meets twice a year, has members from 10 different countries. MRG has consultative status with the United Nations Economic and Social Council (ECOSOC), and observer status with the African Commission on Human and Peoples' Rights (ACHPR). MRG is registered as a charity and a company limited by guarantee under English law. Registered charity no. 282305, limited company no. 1544957.

© Minority Rights Group International 2010
All rights reserved

Material from this publication may be reproduced for teaching or for other non-commercial purposes. No part of it may be reproduced in any form for commercial purposes without the prior express permission of the copyright holders. For further information please contact MRG. A CIP catalogue record of this publication is available from the British Library.
**ISBN** 978 1 907919 01 5. **Published** October 2010. Printed in the UK on recycled paper. **Daawo La'aanta: Beelaha laga tirada Badan yahay Soomaaliya ee La Illaawey** is published by MRG as a contribution to public understanding of the issue which forms its subject. The text and views of the author do not necessarily represent in every detail and all its aspects, the collective view of MRG.

# Daawo La'aanta: Beelaha laga tirada Badan yahay Soomaaliya ee La Illaawey

**Qoraaga Martin Hill**

# Tusmada


| | |
|---|---|
| Ereyada la soo gaabiyey | 2 |
| Warbixinta oo Soo kooban | 3 |
| Horudhac | 5 |
| Maab | 7 |
| Nidaamka qabiillada ee Soomaaliya: xukunka qolooyinka tiro badan | 8 |
| Beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliya: Dhaxalka ka durugsanaanta bulshada iyo kalasooca dhaqan galay | 9 |
| Dhibaatooyinka hadda ku wajahan beelaha laga tirada badan yahay | 16 |
| Xadgudubka xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay ayadoo loo eegaayo gobol ka gobol | 20 |
| Qaxootida beelaha laga tirada badan yahay iyo Soomaalida dalalka caalamka ku nool | 29 |
| Hababka wax loo xalliyo: xoojinta xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay ayadoo loo maraayo adeegyo caalam ah | 31 |
| Taloyinka | 33 |
| Lifaaqa 1: Habka Cilmi-baariska | 35 |
| Lifaaqa B: Qaamuus-yare | 36 |
| Buugaagta la xushtey | 38 |
| Qoraallada | 39 |

# Ereyada la soo gaabiyey

**AMISOM** African Union Mission for Somalia (Ergada Midowga Afrika ee jooga Soomaaliya)

**CAT** Convention Against Torture (Heshiiska Ka soo horjeeda Silic-dilyada)

**CEDAW** Convention on the Elimination of All Forms of Discrimination against Women (Heshiiska ku saabsan Tirtiridda Dhammaan Noocyada Kalasooca ee loo geysto Haweenka)

**CERD** Committee on the Elimination of Racial Discrimination (Guddiga Tirtiridda Kalasooca ku salaysan Jinsiyadda)

**CRC** Convention on the Rights of the Child (Heshiiska ku saabsan Xuquuqda Carruurta)

**EU** European Union (Midowga Yurub)

**ICCPR** International Covenant on Civil and Political Rights (Heshiiska Caalamiga ah ee ku saabsan Xuquuqda Sharciyeed iyo Siyaasiyeed)

**ICERD** International Convention on the Elimination of All Forms of Racial Discrimination (Heshiiska Caalamiga ah ee ku saabsan Tirtiridda Dhammaan Noocyada Kalasooca ee ku salaysan Jinsiyadda)

**ICESCR** International Covenant on Economic, Social and Cultural Rights (Heshiiska Caalamiga ah ee ku saabsan Xuquuqda Dhaqaale, Bulsheed iyo Dhaqameed)

**ICG** International Crisis Group (Ururka Waqtiga shiddada ee Caalamiga ah)

**ICU** Islamic Courts Union (Midowga Maxkamadaha Islaamiga ah)

**IDP** internally displaced person (qof gudaha dalka ku barakacay)

**ILO** International Labour Organization (Ururka Caalamiga ah ee Shaqaalaha)

**NGO** Non-governmental organization (Urur aanan dawli ahayn)

**NSS** National Security Service (Adeegga Amniga Qaranka)

**SNM** Somali National Movement (Dhaqdhaqaaqa Qaranka Soomaaliyeed)

**SOMRAF** Somali Minority Rights and Aid Forum (Golaha Xuquuqda Beelaha laga tirada badan yahay iyo Caawimaadda ee Soomaaliyeed)

**TFC** Transitional Federal Charter (Xeerka Federaaliga ah ee Dawladda ku meelgaar ah)

**TFG** Transitional Federal Government (Dawladda Federaaliga ah ee Ku meelgaar ah)

**TNG** Transitional National Government (Dawladda Qaran ee Ku meelgaar ah)

**UNCHR** UN Commission on Human Rights (Guddiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Insaanka)

**UNDM** United Nations Declaration on the Rights of Persons Belonging to National or Ethnic, Religious and Linguistic Minorities (Bayaanka Qaramada Midoobay ee ku saabsan Xuquuqda Dadka Ka soo jeeda Qolooyinka ku tiro yar Qaranka ama Jinsiyadda, Diinta iyo Luqadda)

**UNDP** United Nations Development Programme (Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay)

**UNESCO** UN Educational, Scientific and Cultural Organization (Ururka Qaramada Midoobay ee Tacliinta, Cilmisayniska iyo Dhaqanka)

**UNHCR** United Nations High Commissioner for Refugees (Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootida)

**UN OCHA** United Nations Office for the Coordination of Humanitarian Affairs (Xafiiska Qaramada Midoobay ee Isuduwidda Hawlaha Samafalka)

**UNOSOM** United Nations Operation in Somalia (Hawgalka Qaramada Midoobay ee Soomaaliya gudaheeda)

**USWO** Ubah Social Welfare Organization (Ururka Wanaagga Bulsheed ee Ubah)

**VOSOMWO** Voice of Somaliland Minority Women Organization (Ururka Codka Haweenka Beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliland)

**WFP** World Food Programme (Hay'adda Cunnada Adduunka)

# Warbixinta oo Soo kooban

Halganka loogu jiro xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliya waxuu barbar socdaa xaaladda tobaneeyadii sano ee ugu dambeeyey ee dadkoo dhan loogu geystey xadgudubka xuquuqda insaanka, laga bilaabo silic-dilyadii badnayd iyo cadaadiskii siyaasiyeed ee xukunkii Siad Barre ilaa burburkii dawladda ee 1991kii iyo dagaalkii sokeeye ee ka dib bilaabmay ilaa iminkana socda. Xadgudubyo culus ayaa loo geystay Soomaalida dhammaanteed, ha ahaadaan qolooyin tiro badan iyo kuwo tiro yarba.

Hase yeeshee, qolooyinka tiro badan waxay ka faa'iido helaan nidaam qabiil oo dhaqan ah oo ay ka heleen nabadgalyo iyo mudnaan aan diyaar u ahayn beelaha laga tirada badan yahay, kuwaasoo, colaad kastoo jirtaba, hore loogu geystay quursi iyo dibad uga saaridda nolosha caadiga ah ee dhaqaale, bulsheed iyo siyaasiyeed, taasoo ay sabab u tahay dhaxaltooyo ay u yeesheen addoonsi, midabtakoor caado ah, hanti ka qaadid iyo barakac.

Nidaamka qabiilka ee ay isku tiiriyaan qolooyinka tiro badan ayaa beelaha laga tirada badan yahay weli ka horjoogsanaya in ay si wax ku ool ah uga qayb qaataan siyaasadda iyo shaqada; waxuu ka xannibaa helitaanka caddaalad fiican marka xadgudub loo geysto ama marka iyaga dembiga lagu eedeeyo; waxuu iyaga u diidaa xuquuqda ay u leeyihiin horumarka, tacliinta iyo samaysiga habnololeed waara; waxuuna ka horjoogsadaa oo loogu ciqaabaa guursiga xubnaha qolooyinka tiro badan. Qolooyinka tiro badan waxay weliba si caadi ah beelaha laga tirada badan yahay ugu geystaan hadallo neceyb ah, taasoo suurtogelisay in la sii wado dacaayadaynta beelaha laga tirada badan yahay ee ku salaysan muuqaalka jirkooda iyo caadooyinkooda dhaqameed, sidaasoo ay kaga sii durkaan bulshada inteeda kale.

Dagaal sokeeye, iyo fallaagada Islaamiga ah ee ka dib ka soo horjeesatay dawladdii ku meelgaarka ahayd ee daciifsanayd ee konfurta dhexe ee Soomaaliya, ayaa keenay in kumanaan qof oo beelaha laga tirada badan yahay ah ay ka cararaan guryahoodii, iyagoo u baxay qaybaha kale ee Soomaaliya iyo dibadahaba. Beelaha laga tirada badan yahay waxaa loogu abbaaranayaa waa la'aanta dad ilaaliya iyo weliba, mararka qaar, sababtoo ah diinta ama dhaqannada kale ee ay haystaan iyo caadooyinkooda.

Ururka MRG waxuu soo ogaaday in haweenka qolooyinka tiro, gaar ahaan, loo geysto xadgudub aad u fool xun oo ku yimaadda barakaca. Cilmibaareyaasha ururka MRG waxay sanadkii 2009kii booqdeen xerooyin loogu talagalay dadka gudaha dalka ku barakaca (IDP) kuwaasoo ku yaalla gobollada Buntland ee qayb ahaan ismaamula, ee waqooyiga bari ee Soomaaliya, waxaana loo sheegay in uu jiro habdhaqan laga naxo oo joogto ah oo lagu kufsado haweenka beelaha laga tirada badan yahay, kaasoo ay la yimaaddaan ragga qolooyinka tiro badan mararka qaarna xubnaha booliiska, militariga ama amniga ee Buntland.

Gobollada konfurta dhexe ee Soomaaliya ee ay shiddadu ka dhammaan laadahay, xarakada hubaysan ee al-Shabaab ayaa sanadkii ugu dambeeyey weerarro rabshad badan u geystey beelaha laga tirada badan yahay, gaar ahaan Bantuda iyo Kiristanka, iyadoo laga soo warbixiyey toogashooyin, madax ka jarid iyo soo dejinta sharciyo xannibaya caadooyinka diinta ku salaysan, iyadoo dadka yeeli waayana ay uga yimaaddaan dhibaatooyin adag. Colaaddu waxay sanadkan 2010 oo keliya ku khasabtay dad kumanaan gaaraya oo gobolladaas ku noolaa in ay halkaas ka cararaan.

Waxay warbixintu muujinaysaa in Jamhuuriyadda Soomaaliland ee iskeed isu taagtay ee nabad guud ka jirto ay beelaha laga tirada badan yahay ku helaan dulqaad dheeraad ah. Hase yeeshee, wixii horumar ahaa ee la gaari lahaa waxaa soo gaabiyey waxqabad la'aanta dawladda, akhlaaqda dawladda ee liddi ku ah dadka u halgama xuquuqda insaanka, iyo xubnaha qabiillada tiro badan oo sii wada habdhaqanka waxyeellayn ah ee saamaynaya horumarka tacliimeed iyo bulsheed ee beelaha laga tirada badan yahay.

Ururka MRG waxuu ogsoon yahay in ay aad u adag tahay in la horumariyo xuquuqda insaanka ee beelaha laga tirada badan yahay marka lagu jiro colaad aan kala go'ayn, laakiin waa in aanan marwalba dib loo riixin. Sidaas darteed waxuu ururku soo jeedinayaa talooyinka soo socda, oo kuwo kale soo raacaan:

- Waa in Dastuurka cusub ee mustaqbalka loo soo saaro Soomaaliya si gaar ah loogu aqoonsado beelaha laga tirada badan yahay ee dalka jooga, waana in kaas lagu adkeeyo xuquuqda ay u leeyihiin sinnaanta iyo kalasooc la'aanta ee waafaqsan xeerasha xuquuqda insaanka ee caalamka.
- Waa in la hubiyo in helitaanka caddaaladda xubnaha beelaha laga tirada badan yahay ay ula siman yihiin dadka kale, iyadoo matalan dadweynaha wax la barayo lana tababbarayo si xaakimiinta, booliiska, xeer-ilaaliyeyaasha iyo looyarrada difaaca loo baro arrimaha iyo xeerasha khuseeya xuquuqda beelaha laga tirada

badan yahay, iyagoona laga hirgeliyo nidaamka caddaaladda ee dalka.

- Waa in lagu dhaqaaqo tallaabooyin gaar ah oo lagu dhawrayo laguna abaabulayo xuquuqda haweenka ka soo jeeda beelaha tiro yar, ee iyagu la kulma kalasooc wajahado badan oo ku salaysan jinsigooda iyo kaalintooda qolada tiro yar.
- Beesha caalamku waa in ay taageero ka bixiso ballaarinta shaqada Soomaaliya uu ka wado Xafiiska Madaxa guddiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Insaanka si loogu daro barnaamij gaar ah oo loogu talagalay xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay, kaasoo barbar socda kaalinta Khabiirka Madaxbannaan ee Soomaaliya u xilsaaran (Independent Expert for Somalia), waana in ay taageero ka bixiso waxqabadka caalamiga ah iyo goboleed ee lagu abaabulayo xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliya iyadoo loo sii maro tusaale ahaan Golaha Xuquuqda Insaanka ee Qaramada Midoobay (UN Human Rights Council) iyo Guddiga Xuquuqda Insaanka iyo Dadyowga ee Afrika (African Commission on Human and Peoples' Rights).

# Horudhac

Xaaladda ay ku sugan yihiin beelaha laga tirada badan yahay waa in la barbar dhigo duruufta ay Soomaaliya ku soo jirtay 20kii sanadood ee ugu dambeeyey oo la soo maray burburkii dawladda, dagaal iyo affadii ka dib dadka gaartay. Xadgudubyo aad u ballaaran oo ku saabsan xuquuqda insaanka ee aasaasiga ah ayaa loo geystey Soomaalida dhammaanteed, qolooyinka tiro badan iyo kuwo tiro yarba, waxuuna ururka MRG ogsoon yahay in ay adag tahay in la soo helo dariiq lagaga baxo colaadaha u muuqda kuwo aan dhammaanayn ee noocyo badan ee lagu soo jiray tan iyo burburkii dawladda ee sanadkii 1991kii.

Soomaaliya waxay indhaha caalamka ugu soo jeesteen qaskaas awgii, laakiin beelaha laga tirada badan yahay ee dalku ilaa iyo iminka ma haystaan nidaam lagu ilaaliyo xuquuqdooda insaanka iyo kaalmayn samafal ah oo ku filan. Macluumaadka iyaga ku saabsan waa kuwo aanan dhammaystirnayn dadkuna ma wada oga, inkastoo dhowr warbixinood xaaladdooda laga soo saaray labaatankii sanadood ee ugu dambeeyey, sida matalan kuwa ay soo saareen ururrada Soomaaliyeed ee u dooda beelaha laga tirada badan yahay iyo culimada Soomaaliyeed. Warbixinnada caalamka ee ku saabsan dhibaatada Soomaaliya si dhif ah ayaa loogu soo hadal qaadaa beelaha laga tirada badan yahay iyo xuquuqdooda.[1]

Hase ahaatee, haddana weligeed dib looma riixi karo hirgelinta xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay ee la quursado, iyagoo qayb lagama maarmaan ah oo ballaaran ka leh mujtamaca Soomaaliyeed. Beelaha laga tirada badan yahay waxaa ku wajahan kalasooc mujtamaca ka dhaqan galay iyo xadgudubyo aad u daran oo loo geysto xuquuqdooda insaanka. Nidaamka caadiga ah ee qabiillada ku dhisan ee ay aasaaseen qolooyinka tiro badan ayaa beelaha laga tirada badan yahay weli ka horjoogsanaya in ay ka qayb qaataan siyaasadda iyo shaqada; waxuu ka xannibaa helitaanka caddaalad fiican marka xadgudub loo geysto ama marka iyaga dembiga lagu eedeeyo; waxuu iyaga u diidaa xuquuqda ay u leeyihiin horumarka, tacliinta iyo samaysiga habnololeed waara waxuuna yareeyaa isguursiga qolooyinka tiro badan iyo kuwo tiro yar.

Haweenka beelaha laga tirada badan yahay waxaa ku wajahan kalasooc noocyo badan: waxaa lagu xadgudbaa xuquuqdooda insaanka ee haween ahaan u yaalla, taasoo uga timaadda nidaamyada siyaasiyeed ee dadweynaha iyo akhlaaqda bulsheed ee ragga, iyo weliba beelaha gaarka ah. Maxaa dheer, habdhaqan rabshad ku dheehan tahay oo laga argagaxo oo ku salaysan jinsiga ayaa loo geystaa haweenka ka soo jeeda beelaha laga tirada badan yahay ee ku rafaadaya xarumaha IDP ee gobollada Buntland ee waqooyi bari kaga yaalla dalka.

Waxa marka hore keenaya in aanan si fiican xaaladda loo fahmin waa maqnaanshaha macluumaad la isku tiiryo. Ma jiro tirakoob la isku hallayn karo oo laga hayo shacabka Soomaaliya sababtoo ah qaska iyo qalalaasaha dalka ka jira, sidaas darteedna ma jiro war ku saabsan waxa beelaha laga tirada badan yahay ay dhibaatada kala kulmeen, gaar ahaan marka la eego tirakoobka beelaha laga tirada badan yahay ee dalka guud ahaan ka maqan. Tirakoobyadii shacabka ee dagaalka sokeeye ka horreeyey waxay ahaayeen kuwo shaki ka jiro oo la khilaafsan yahay. Waxaa isbedbeddel ka muuqdaa caddadka lagu xisaabinayo shacabka Soomaaliya ee hadda, oo ay ku jirto Soomaaliland (jamhuuriyadda iskeed isu taagtay ee waqooyi galbeed ku taalla), iyadoo qiyaasta ugu dambaysay ee laga helay Bangiga Adduunku (World Bank) ay shacabka ku beegayso qiyaas ahaan 9 milyan oo qof.[2] Qiyaasta laga helay Xafiiska Qaramada Midoobay ee Isuduwidda Hawlaha Samafalka (OCHA), marka lagu daro caddad ka yimid masuuliyiinta iskood isu taag ah ee Buntland, waxay taasi tilmaamaysaa in caddadka guud ee shacabku intaas ka badnaan karo, iyadoo qiyaas ahaan 5 milyan ay ku nool yihiin konfurta dhexe ee Soomaaliya,[3] qiyaas ahaan 2 ilaa 3 milyan ay joogaan Soomaaliland,[4] iyo ilaa 2.4 milyan ay ku nool yihiin Buntland.[5]

Sidoo kale, waxaa aad u yar tirakoobka saboolnimada beelaha laga tirada badan yahay. Soomaaliya waxay meelaha ugu hooseeya kaga jirtaa dalalka adduunka ugu saboolsan marka dhowr tusiyaal la raaco.[6] Sida ay sheegtay Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootidu (UNHCR), colaadda sii socota ayaa keentay in dad tiradoodu gaarayso 1.4 milyan ay ku barakacaan dalka gudihiisa oo ay tagaan konfurta dhexe ee Soomaaliya iyo Soomaaliland waqtigii ku beegnaa dhammaadkii bishii Abriil 2010, iyadoo islamarkaana ay milyan nuskii u qaxeen dalalka dariska la ah Soomaaliya.[7] Hay'adda Cunnada Adduunku (WFP) waxay soo ogaatay in dad tiradoodu gaarayso 2.5 milyan – qiyaas ahaan saddex meelood meel shacabka waddanka – ee dalka ku kala baahsan ay u baahan yihiin caawimaad cunto ah.[8]

Waxaa laga yaabaa, inkastoo aanan si dhammaystiran loo soo baarin, in beelaha laga tirada badan yahay ay guud ahaan colaaddu u saamaysay (marka loogu saami dhigo tirada dadkooda), si ka daran qolooyinka tiro badan,

marka la xasuusto khasaaraha iyo kalasooca aad u daran ee hore u soo gaaray beelaha laga tirada badan yahay.

Waxaa dalka ka jira shuruuc u gaar ah, oo siyaado ku ah xeerasha caalamka ee la aqoonsan yahay ee khuseeya xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay kuwaasoo lagu soo dhigay heshiisyo iyo bayaanno kaladuwan. Dastuurka Soomaaliland (oo aftiqaadid lagu soo oggolaaday maalintii 31kii May 2001dii),[9] Dastuurka Dawladda ku meelgaar ah ee Buntland (oo la soo oggolaaday maalintii 5tii Juun 2001dii),[10] iyo Xeerka Dawladda Federaaliga ah ee Ku meelgaarka ah (TFG) ee Soomaaliya,[11] ayaa dhammaantood u huran sinnaanta iyo kalasooc la'aanta muwaadiniintooda dhammaantood. Xeerasha sharciyeed ee kuwaas ku jira waxay yihiin kuwo cilmaani ah asal ahaan waxayna guud ahaan hirgelinayaan isla xuquuqda noocyadaas kaladuwan ah.

Kalasooca loo geysto beelaha laga tirada badan yahay waxuu ka yimid akhlaaqyo bulsheed oo taariikh loo leeyahay iyo xeerar caado ah. Wixii isbeddel ah ee muuqda waa mid si aayar ah u yimid oo aan dalkoo dhan ku wada fidsanayn, maadaama aanay jirin shuruuc gaar ah oo kalasooc la'aanta ku saabsan, tallaabooyin bulshada lagu dhexgeliyo beelaha laga tirada badan yahay ama ololeyaal dadweynaha lagaga wacyigeliyo danta beelaha laga tirada badan yahay. Waxaa markaa si degdeg ah taageero iyo ilo ugu baahan dadka u dooda beelaha laga tirada badan yahay.

Soomaalida dhexdooda waxaa si aayar ah ugu kordhaya aqoonsiga, iyo u doodista, xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay. Waxaa aragti ahaan la aqbalay in beelaha laga tirada badan yahay ay ka qayb galaan dawladda iyo baarlamaanka. Waxay beelaha laga tirada badan yahay wakiillo ku lahaayeen heshiiska xukun qaybsiga ee TFG oo ku toosan Xeerka Federaaliga ah ee Dawladda ku meelgaarka ah (TFC) oo la anshixiyey sanadkii 2004tii.

Haddana waxaa jira meelo farabadan oo weli u baahan in horumar laga gaaro kuwaasoo khuseeya dhawrista xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay iyo habnololeedkooda, iyo joojinta akhlaaqda bulsheed ee waxyeellaynta leh ee taariikhda ay u leeyihiin qolooyinka tiro badan.

Waxay warbixintani ku salaysan tahay hawl macluumaad soo ururin oo cusub oo uu qabtay ururka MRG[12] iyadoo weliba ku daraysa cilmibaarista hore loo soo qabtay. Waxay tilmaamaysaa baahiyaha sida dhakhso badan ama degdegga ah uga jira meelaha dhibaataysan iyo meelaha aan dhibaataysnayn ee dalka, iyo weliba isbeddellada mustaqbalka fog loo baahan doono marka xaaladda qayb kasteba ay xasillooni gaarto ee ay ku habboon tahay xeerka maamulka.

# Horn of Africa



# Nidaamka qabiillada ee Soomaaliya: xukunka qolooyinka tiro badan

Nidaamka qabiilladu waxuu weli muhiim u yahay Soomaaliya bulsho ahaan iyo siyaasad ahaanba. Qolooyinka tiro badan ee Soomaaliyeed (caadi ahaan loo yaqaanno 'bilis')[13] waxay u kala baxaan afar reer qabiil oo awooweyaasha laga soo qaatay: Daarood,[14] Hawiye iyo Dir, oo iyagu ka soo jeeda nidaamka dhaqaale iyo bulsheed ee xoolo dhaqatada guurta, iyo Rahanweyn (oo weliba loo yaqaanno Digil-Mirifle), oo iyagu ah beerafalato xoolo haysta (xoolo dhaqato beero falata). Qabiilladaas, oo dhaqan u leh in ay hub qaataan, waxay soo haysteen dawladda casriga ah, siyaasadda, dhaqaalaha, iyo nolosha magaaleed tan iyo markii taliska lagala wareegay guumeysigii sanadkii 1960kii.

Nidaamka qabiillada waxaa hore loogu tilmaamay 'dimoqraadiyad xoolo dhaqasho',[15] iyadoo inta badan lagu diiday in meel keliya dalka laga wada xukumo haba yaraatee. Qabiilladu waxay ku dhaqmaan nidaamyo xeel dheer oo lagu xalliyo wixii khilaaf ah, dhexdhexaadin iyo wadashaqayn oo ku toosan xeerka caado ah.[16]

Ka dib isbeddelladii ballaarnaa ee qarni nuskii ku soo gaaray bulshada ee ka bilaabmay dhammaadkii guumeysigii, xorriyaddii dalka, kelitaliskii siyaasadeed, burburkii dawladda, colaaddii hubka la isugu qaatay iyo dadka Soomaaliyeed ee adduunka qaxootinimo ugu kala baahay, waxay qabiilladu weli yihiin, inta badan, qaabka gaar ahaaneed ee ay ku dhisan yihiin nidaamyada dawladda Soomaaliyeed iyo mujtamaca Soomaaliyeed ee ka dambeeyey guumeysigii.[17]

Qaar ka mid xubnaha qolooyinka tiro badan, ee dhibaatooyin dhaqaale qaba, ayaa u guuray shaqooyin ay hore u qaban jireen uun qolooyin tiro yar oo gaar ah, sida kabatolista, ka shaqaynta saanta, iyo guryo dhisidda, iyadoo beelaha laga tirada badan yahay ee meelahaas ka baxay ay doonteen jagooyin dhaqaale iyo siyaasadeed oo casri ah welibana cusub. Hase yeeshee, daliilka uu ururka MRG u soo qaaday warbixintan waxaa weli aad ugu cad caadooyinka taariikh loo leeyahay ee xukunka qabiilka ku salaysan iyo xadgudubka qolooyinka tiro badan ku hayaan xuquuqda insaanka ee beelaha laga tirada badan yahay

## Qolooyinka tiro badan ee Soomaaliya

- **Daarood:** reer ama isutag qabiil oo ugu awood badan Buntland, iyadoo jilibyo qabiilka ka mid ahi ay joogaan bariga Soomaaliland iyo konfurta Soomaaliya.
- **Hawiye:** qabiil ugu awood badan Muqdisho, gobolka ku hareersan ee Banaadir, iyo weliba gobollada Hiiraan, Galgaduud iyo Shabeellada Dhexe.
- Dir: reer qabiil oo ka kooban Isaaq iyo Gadabuursi oo jooga Soomaaliland, Ciise oo jooga Jabuuti, iyo Biyamaal oo jooga konfurta Soomaaliya.
- **Rahanweyn** oo weliba loo yaqaanno Digil-Mirifle**:**[18] isutag qabiil, ku nool qaybta beeraha ee u dhexeysa webiyada Jubba iyo Shabeelle ee konfurta Soomaaliya, oo iminka darajo ahaan u dhigma saddexda qabiil ee xoolo dhaqato ah, iyagoo ka kooban laba qabiil oo xoolo dhaqato beero falata oo la isku geeyey – Digil iyo Mirifle – iyagoo sheeganaya in ay ka yimaaddeen awoowe keliya.

# Beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliya: Dhaxalka ka durugsanaanta bulshada iyo kalasooca dhaqan galay

## Beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliya: oo kooban

- **Bantu (ama Jareer)**, qolada tiro yar ee ugu weyn: waxay ka kooban yihiin dad ka yimid dad addoomo ahaan jiray oo la soo qaaday ama soo baxsaday, iyo beero falato dhulka loogu yimid; waxay inta ugu badan ahaayeen beero falato iyo farsamo yaqaan ku nool qaybaha beeraha ee webiyada u dhexeeya ee ku yaalla konfurta Soomaaliya, iyagoo qaar goor dambe u guureen ama u carareen meelo kale oo Soomaaliya ka mid ah.
- **Beelaha farsmomaalka ah**, oo taariikh ahaan loo yaqaannay Midgaan (ama caadi ahaan waqtiga xaadirka ah loo yaqaanno Gabooye, Madhibaan iyo Muuse Deriyo, oo hore u ahaan jiray ugaarsato iyo dad ka shaqeeya saanta iyagoo hawlo kaloo dhaqameed iyo farasameed u qaban jiray qolooyinka tiro badan); Tumaal (biro sanceeye); iyo Yibro (takhasus u leh dhaqanka). Waxay ku kala baahsan yihiin Soomaaliya (Soomaaliland iyo Buntland), Itoobiya iyo Jabuuti.
- **Banaadiri:** beelo ganacsato ah baayacmushtar ku dhisan oo ka yimid dhulka Carabta iyagoo inta ugu badan ku nool magaalooyinka xeebaha konfurta Soomaaliya – Muqdisho, Marka iyo Baraawe.
- **Beelaha Xerta ah ama wadaada ah ee tirade yar**, *Qolooyinka diimeed ee tiro yar:* waxaa kuwaas ka mid ah tiro yar oo Soomaali Kiristan ah, iyo weliba qolooyin tiro yar oo ka mid ah diinta Islaamka – Ashraf iyo Shekhal.

Beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliya way kaladuwan yihiin oo kuma dhisna oo keliya mawduucyada jinsiyadda, diinta ama luqadda ee ay ku kaladuwan yihiin sida ku qayaxan Bayaanka Qaramada Midoobay ee ku saabsan Xuquuqda Dadka ka soo jeeda Qolooyinka ku tiro yar Qaranka ama Jinsiyadda, Diinta iyo Luqadda.[19] Waxay kaladuwanaantaasi weliba ku salaysan tahay farqiyada bulsheed iyo taariikheed ee u dhexeeya beelaha laga tirada badan yahay iyo qolooyinka tiro badan ee xoolo dhaqato ah ee qaybta hore ku xusan.

Beelaha laga tirada badan yahay waxay ugu badnaan ka kooban yihiin saddex qolooyin bulsheed oo kala cad oo aanan hub qaadan – Bantu, Banaadiri iyo 'qolooyinka xoogsada'. Dhammaan beelaha laga tirada badan yahay waxay sidoo kale yihiin Soomaali, iyagoo qolooyinka tiro badan la wadaaga luqadda iyo sifooyin dhaqameed oo farabadan.

Beelaha laga tirada badan yahay waxay ugu badnaan ka yimaaddeen xaalado taariikheed iyo dhaqameed oo gaar ah.[20] Bantudu waxay tilmaamayaan dhaxalkii ka yimid ganacsigii addoomada ee qarnigii sagaal iyo tobanaad ay samayn jireen Carabtii joogtay Sansibaar, goortaasoo Afrikaantii laga soo qabtay bariga iyo konfurta Afrika la geeyey Soomaaliya oo laga iibiyey Soomaalida. Dadka Banaadiri ah waxay ka yimaaddeen beelihii ganacsatada ajnabi ahayd ee soo degtay magaalooyinka xeebeed ee konfurta 1,500 oo sanadood ka hor, iyagoo ka soo guuray Gacanka Carbeed. 'Qolooyinka xoogsada' ee darajo yar, ee aanan xoolo dhaqato ahayn waxay hidde u lahaayeen in ay u adeegaan qolooyinka xoolo dhaqatada ah iyagoo la lahaa xiriir kalasooc ku dheehan yahay.[21]

Ka hor barakaca dadka farabadan ee dalka gudihiisa ka soo socday tan iyo sanadkii 1991kii colaadda awgeed, Bantudu waxay hore ugu badnaayeen gobollada beera falatada iyo kaymaha ee webiyada u dhexeeya ee konfurta Soomaaliya. Dadka Banaadiri ahi waxay ku noolaayeen magaalooyin ku yaalla xeebaha konfurta dalka, iyagoo qolooyinka xoogsada ay ku kala baahsanaayeen baadiyaha iyo magaalooyinka badidood iyagoo u kala baxsanaa beelo tiro yar.

Bantuda iyo qolooyinka xoogsada waxaa caado u ahayd in ay ku xirnaadaan qabiillo iyo isirro gaar ah oo[22]

degaaneed iyagoo addoon u ahaa. Xiriirradaas addoonimo (oo loo yaqaanno sheegad) waxay burburayeen marka shakhsi ama qoys ay cararaan, dal kale u guuraan ama abbaankoodu dhinto, sidaasoo ay iyagu xorriyad ku helayeen laakiin ay ku ilaalo waayayeen. Qaarkood waxay isku dayi jireen in ay halkaas ka baxsadaan iyagoo meel kale u guuri jiray oo samaysan jiray awoowe been ah si ay isaga dhigaan xubin qabiilka ka mid ah, badi qabiilkii hore u ilaalin jiray.[23]

Saddexda qolooyin ee tiro yar waxay dhammaantood yihiin dad la quursado, kalasooc loo geysto,[24] oo guud ahaan ka mamnuucan in ay qabiillada waaweyn is guursadaan, taasoo ah wax iyaga ku sii waday in ay guud ahaan ka durugsanaadaan qolooyinka tiro badan qarniyo badan. Ka durugsanaanta bulshada ee Bantuda iyo 'qolooyinka xoogsada' – beelaha laga tirada badan yahay ee midabtakoorka iyo kalasooca ugu badan loo geysto – waxaa qeexaya murtida Soomaaliyeed ee caanka ah ee tiraahda, 'looma-ooyaan ayaad tahay' iyo 'looma-aaraan ayaad tahay', taasoo tilmaamaysa in beelaha laga tirada badan yahay aanay filan karayn in daawo loo soo helo haddii xuquuqdooda lagu xadgudbo.[25] Qabiillada tiro badan waxaa caado u ahayd in ay diidaan in ay guursadaan dad ka soo jeeda beelaha laga tirada badan yahay ama in ay iyaga wax la cunaan (iyagoo u arkayey in siyaabaha ay wax u cunaan qaarkood ay wasakh yihiin).

Caddadyada qiyaasan ee beelaha laga tirada badan yahay waxay yihiin kuwo inta badan loo malaynayo muran ayaana ka jira, maxaa yeelay ma jiro tirakoob la isku hallayn karo ama dhawaan la qabtay oo laga qaaday shacabka. UN OCHA sanadkii 2002dii waxuu ku qiyaasay in beelaha laga tirada badan yahay ay u dhigmaan saddex meelood meel wadarta shacabka, ama laba milyan oo ka mid ahaa lixdii milyan ee qof ee dalka waqtigaas joogay.[26]

Haddii ay weli guud ahaan sax tahay qiyaastaas saddex meelood meel, waxaa laga yaabaa in beelaha laga tirada badan yahay ay iminka gaarayaan ilaa 3 milyan oo ka mid ah qiyaasta shacabka ee 9 milyan ah (marka Soomaaliya iyo Soomaaliland la isku daro). Waqtigaas, OCHA waxuu Bantuda ku qiyaasay in ay u dhigmaan boqolkiiba 15 shacabka waddanka, ama 1 milyan, Banaadiri 1.5 milyan, iyo Midgaan/Tumaal/Yibro 1.5 milyan, inkastoo la filanayo in caddadyadaasi ay iminka hoos u qiyaasayaan dadka Bantu oo ay siyaado u qiyaasayaan qolooyinka kale ee tiro yar. Waxaa laga yaabaa in Bantudu ay u dhigmayeen ilaa nus shacabkii (ka hor 1991kii) joogay qaybaha webiyada u dhexeeya.[27] Dadka u dooda Bantuda/cilmibaareyaashu waxay tilmaamayaan in Bantudu ay u dhigmaan boqolkiiba 20 tirada guud ee shacabka Soomaaliyeed ee hadda.[28]

Maadaama uusan jirin tirakoob waqtiga ku habboon oo dhammaystiran oo ku saabsan shacabka beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliyeed waxay taasi keenaysaa in hay'adaha caalamku ay isku dayaan in ay soo saaraan qiyaaso iyo macluumaad aanan isku darnayn oo ku saabsan qolooyinka kaladuwan ee tiro yar, si loo wanaajin karo baarista iyo ka jawaabcelinta baahiyahooda horumarka iyo caawimaadda.

## Bantu (Jareer)[29]

Bantudu waxay weli haystaan caadooyin iyo sifooyin dhaqameed oo farabadan oo u soo jiray tan iyo muddadii ka horraysay markii addoon ahaan loo soo qabtay ee la keenay Soomaaliya. Caadooyinkaasi waxay ku darsadeen qaababka cusub ee bulsheed ee ay ka samaysteen Soomaaliya.[30] Magaca 'Bantu' waxuu ka yimid aqoonsigii dhammaadkii qarnigii 20aad ee asalkooda, muuqaalkooda, hiddahooda dhaqameed iyo isirradooda Afrikada Madow. Waxaa caado u ahayd in si darajo hoosaysa loo dhexgeliyo qabiillada iyo isirrada Soomaaliyeed.

Bantuda qaarkood waxay si fog ugu abtirsadaan beelihii beera falatada ahayd ee waqtiyadii ugu horreeyey dhulka loogu yimid iyagoo ka horreeyey markii ay xoolo dhaqatadu u soo guureen dhulka oo qarnigii sagaal tobanaad samaystay beelo gaar ah oo loo yaqaanno Goosha. Inkastoo addoonsigu meelahaas uu aad ugu badnaa, haddana mujtamaca Bantu ee waqtiga xaadirka ahi waxay ugu badnaan ka yimaaddeen boqolladii kun ee Afrikaantii lagu addoonsday ganacsigii addoomaha ee Carabtu wadday qarnigii sagaal iyo tobanaad.

Bantuda waxaa lagaga shaqaysan jiray lacag la'aan beeraha konfurta dalka ee iyagu alaabooyin ay ka mid yihiin misig iyo saliidda sisinta geyn jiray Bariga Dhexe iyo meelo kale. Waxay weliba qaban jireen shaqooyinka xoolo raacidda, adeegeyaasha guryaha, dumar guryaha lagu haysto iyo farsamo yaqaan. Qaarkood waxay ku xirnaayeen reero Soomaaliyeed oo degaanka joogay, inkastoo badidood ay gooni ugu noolaayeen dhulal ay dhisteen oo Bantu ah.

Waxaa markii ugu horraysay lagu hayey xukun addoonsi[31] ay taageersanaayeen oo ay dhiirrigelinayeen masuuliyiinta guumeystihii Talyaaniga ahaa ee konfurta (qaybtaasoo markaa loo yaqaannay Dhulka soomaaliyeed ee Talyaaniga (Italian Somaliland)) ilaa markii ugu dambaysay ee sharci ahaan la mamnuucay addoonsiga ee dadka xorriyaddooda la siiyey sanadkii 1903dii. Tiro farabadan ayaa baxsaday si ay beelo addoomo ah oo soo baxsaday uga dhisaan meelaha ugu fog kaymaha webiyada u dhexeeyey; waxaa kuwaas loo saaray magaca Goosha ('dadka kaymaha'). Waxaa u suurtogashay in ay haystaan xorriyad badan, iyo weliba qaar ka mid ah qaababkoodii bulsheed iyo dhaqameed iyo luqadahoodii asalka ahaa, ee tusaale ahaan ka soo jeeday mujtamacyada Zigua, Yao, Nyasa, Makoa, Ngindu iyo Nyika.[32]

Ka dib markii la mamnuucay addoonsiga, addoomo farabadan oo la rukhseeyey ayaa u guuray dhulalka kaymaha si ay ugu biiraan Goosha waxayna iyagu noqdeen Goosha. Kuwii ka haray magdhaw lagama siin addoonsigoodii, qaar farabadan waxay weli u sii shaqaynayeen dadkii haystay, iyagoo mararka qaar weli ku jira xaalad addoonsi u eeg. Qaar kale waxaa u suurtogashay in ay beera falashada si madaxbannaan ugu noolaadaan iyagoo samaystay tuulooyin Bantu ah oo gooni ah. Sanadihii 1930nadii, Bantuda waxaa lagu soo rogay sharci shaqo khasab ah oo cusub oo guumeysiga ka yimid[33] kaasoo iyaga ku khasbayey in ay waqtiyo badan ka shaqeeyaan beeraha dadkii Talyaaniga ahaa ee dhulka u soo guuray iyagoo lacag aanan la siin jirin ama wax aad u yar la siin jiray.

Sida qaybaha kale ee mujtamaca Soomaaliyeed, qabiilladii xoolo dhaqatada ahaa iyo Rahanweyn ayaa dadkaas 'ilaalin' ku siin jiray nidaam dhaqan galay oo ahaa xiriir addoonsi (sheegad) oo ay ku galayeen qaybaha qabiillada degaanka. Bantuda waxay ugu shaqayn jireen 'abbaankooda' lacag la'aan iyagoo ka heli jiray quud iyo baahiyahooda bulsheed ee aasaasiga ah. Waxay sidaas abbaankooda uga helayeen ilaalin ku toosan xeerka caado ah.

Dumarka waa la dhiigmiiran jiray galmo ahaan; xubnaha qabiillada ayaa si caadi ah u kufsan jiray gabdhaha iyo haweenka Bantu ah iyagoo aan waxba laga qaadi jirin, marka la barbar dhigo dhibaatooyinka ka iman jiray kufsashada dumarka qabiillada. Qabiilladu waxay caado u lahaayeen in ay mamnuucaan in ay guursadaan dadka Bantu ah, inkastoo ay iska caadi ahayd in ay guryaha ku haystaan haweenkooda.

Ka dib afganbigii militariga ee xukunka lagaga qaaday dawladdii rayidka ahayd ee xisbiyada badnayd sanadkii 1969kii, isbeddelladii dhaqaalaha ku yimid ayaa fursado cusub Bantuda uga soo saaray horumarinta beeraha iyo ganacsiga. Nidaamyadii kalasooca horjoogsanayey (oo iminka baaba'ay tan iyo burburkii dawladda) ee xukunkii Madaxweyne Siad Barre ayaa Bantuda iyo qolooyinka kale ee tiro yar u furay tacliinta dawladda iyo shaqada dawladda, waxayna iyaga u suurtogeliyeen aqoonsi bulsheed iyo wakiillo ay siyaasadda ku yeeshaan.

Intii ay ku sii shaqaysanayeen oo ay sii baranayeen farsamooyinka ay diiddanayeen xoola dhaqatadu, waxay Bantudu weliba xirfado cusub ka samaysteen beelahooda dhexdood waxayna u wareegeen shaqooyin farsameed oo casri ah oo farabadan, gaar ahaan injiniirnimada (sida dib u hagaajinta baabuurta ama doonyaha), warshadaha, nijaarnimada, qorista looxa, dhismaha guryaha, dhismaha dhagaaxda, iyo rinjiyeynta guryaha.

Hase yeeshee, kalasoocu weli wuu badnaa, taasoo ay ku sii socotay saboolnimadoodu. Bantuda waxaa ka lumay dhul aad u badan sababtoo ah sharcigii diiwaangelinta dhulka ee 1975kii ay soo saartay dawladdii Siad Barre, kaasoo wixii dhul ah ay dawladdu kula wareegtay. Bantudu marar dhif ah ayay caddayn karayeen in ay iska leeyihiin dhulkii ay caado u lahaayeen, welibana xubnaha qabiilladii dawladda ku xirnaa ayaa qaatay ama loo qoondeeyey dhul beero ah iyagoon lacag bixinin ama wax yar bixiyey. Bantu badan waxaa hantida lagala wareegay iyagoon sharciga taas isaga difaaci karin ama isaga ilaalin karin. Bantu waxaa lagu khasbay in ay, badi lacag la'aan, ugu shaqeeyaan hantiileyaashii cusbaa ee badi dhulka aanan joogin.[34]

Sanadihii 1980nadii waxaa ka muuqday heegaan siyaasadeed oo cusub oo ay bilaabeen Bantudu. Ereygii xumaa ee hore Jareer ('timo adag', oo ka yimid awooweyaashooda Afrikaanka ah) ee ay Bantuda ugu yeeri jireen qolooyinka 'bilistu', iyagoo isugu yeeri jiray jileec (timo jilicsan ama galgaloolan, taasoo tilmaamaysay in ay Carab ka yimaaddeen), ayay Bantuda laftigoodu soo qaateen si ay uga dhigtaan ereyga af Soomaali ah ee isku tilmaamayaan. Sanadihii 1990nadii, markii waddamada dunidu ay yimaaddeen Soomaaliya, ereyga Bantu ayaa dhulka ku batay oo noqday mid kan hore la siman oo iyaga lagu tilmaamo.[35]

Sanadihii 1990nadii, goortii dagaalladii sokeeye ee ka dambeeyey burburkii dawladda, hoggaamiyeyaashii dagaal ee uu ka mid ahaa Janaraal Maxamad Caydiid (oo isagu Muqdisho kula dagaallamay cidaankii Maraykanka sanadkii 1993kii), ayaa haystay gobollada konfureed iyagoo ay garab joogaan jabhadahooda qabiil qabiil ku dhisan, waxayna sii wadeen dhulka oo ay dadka xoog kaga qaadaan, dilis, barakicinta khasab ah ee dadka iyo ku shaqaysigooda.[36] Macaluushii darnayd ee sanadkii 1992kii ka dhacday konfurta Soomaaliya ayaa si gaar ah u taabatay dadyowga Bantu iyo Rahanweyn ee qaybaha Baydhaba. Hawlgal samafal ah ee Qaramada Midoobay, UNOSOM, ayaa la bilaabay, laakiin waxay Qaramada Midoobay dalka ka baxeen sanadkii 1995kii, iyagoo aanan wax fiican ka qabanin soo celinta nabadda, jabhadaha oo hubka laga qaado, dib u dhisidda dawladda dhexe iyo midda bogoleed iyo nidaamka caddaaladda, xallinta shiddada insaaniyeed, ama hubinta dhawritaanka xuquuqda insaanka. Dad ka kala socda qabiillada dhammaantood ayay xadgudubyo u geysteen jabhadihii hoggamiyeyaasha dagaal, waxaana baaba'ay ilaalintii ay beelaha laga tirada badan yahay caado u lahaayeen in ay ka helaan qolooyinka tiro badan.

Bantu waxaa si gaar ah u waxyeelleeyey jabhadaha hubaysan (oo u dagaallamayey in ay la wareegaan xukunka dhulka beeraha ah iyo qaybaha magaalooyinka ee konfurta), iyagoo si joogto ah u dhacayey uguna xadgudbayey dadka rayidka ah. Qolooyinku waxay weliba iyaga u diiddanaayeen in ay qayb ka helaan kaalmada macalluusha ee dalka timid. Kumanaan Bantu ah ayaa dalka gudihiisa ku barakacay ama u cararay Kenya.

Ilaa iyo iminka, dadka Bantu si hagaagsan uguma ay suurtogelin in ay soo ceshadaan dhulkii laga xaday sanadihii 1990nadii ama ka hor. Haweeney Bantu ah oo barakacday oo lagu waraystay magaalada Hargaysa sanadkii 2008dii ayaa ka soo warbixisay xaalad goortaas caadi ahayd oo macnaynaysa kalasooca iyo ka horjoogsiga caddaaladda:

> *Waxaannu lahayn dhul yar oo ku yaalla xaafadda Hodan* [ee Muqdisho] *laakiin iminka ma haysanno. Waxaa qaatay qoys Hawiye ah maadaama aannu Bantu nahayna uma tagi karno oo kama soo ceshan karno*[37]

## Xaaladda siyaasiyeed: halganka xukunka loogu jiro, burburkii dawladda iyo xadgudubyada farabadan ee ku yimid xuquuqda insaanka

Halganka loogu jiro xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay waxaa barbar socda xadgudub guud ahaaneed oo muddo badan loo soo geysanayey xuquuqda insaanka. Dawladdii Siad Barre, oo xukunka haysay 1969kii ilaa 1991kii, ayaa xuquuqda insaanka u geysatay xadgudubyo culus, iyagoo ay ka mid yihiin silic-dilyo farabadan, soo xiritaanka dad farabadan oo aan sabab loo hayn iyo cadaadis siyaasiyeed. Taliskii Siad Barre ee shakhsi ahaaneed waxuu inta badan ku tiirsanaa militariga iyo Adeegga Amniga Qaran (NSS), oo ugu badnaan ka koobnaa qabiilkiisa Mareexaan ee reerka qabiil ee Daarood.

Waayihii hore, dawladda Siad Barre si cad ayay u mamnuucday qabyaaladda loo adeegsado si looga helo faa'iido siyaasiyeed ama dhaqaale iyo midda kalasooc loogu geysto beelaha laga tirada badan yahay; nidaamyadaas oo ahaa kuwo ay si googo'an u hirgelin jireen adeegga NSS iyo maxkamadaha amniga ee sabab la'aan ku shaqaynayey. Laguma dhaqaaqin barnaamij dadweynaha lagu barayo xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay lamana soo dejin shuruuc ku saabsan kalasooca, ficil ahaanna, waxay dawladdu sii wadday oo ay sii kordhisay qabyaaladda oo bartamaha ugu jirtay xukunkeeda iyo cadaadiskeeda.

Hase yeeshee, nidaamyada ka soo horjeeday qabyaalladdu waxay gacan ka geysteen wanaajinta xaaladda beelaha laga tirada badan yahay, waxayna weliba taasi ku timid dhiirrigelinta waaxyaha dhaqaale ee aan ku salaysnayn xoolo dhaqashada ee ah beero falashada iyo kalluumaysiga, iyo fikirka rasmiga ahaa ee 'sinnaanta nidaamka hanti-wadaagga', gaar ahaan tacliinta bilaashka u ahayd dadkoo dhan ilaa jaamacadda.

Waxay taasi ahayd markii ugu horraysay ee dadka Bantu iyo qolooyinka xoogsada ay si dhab ah tacliin u heli karayeen. Laakiin nidaamyadaasi ma ay tirtirin kalasooca bulsheed ee jiray. Beero falatada Bantu ahayd ayay waxyeello badani ka soo gaartay reerihii guurtada ahaa ee gobolkooda u soo wareegay muddadii abaartii sanadkii 1974kii, dhul ay caado u lahaayeen ayaana qaar farabadan lagaga qaaday sharcigii diiwaangelinta dhulka iyo minguurintii dhulka ee loo waday beeraha dawladda sanadkii 1975kii. Waxaa dhulkooda badi xoog kaga qaadan jiray xubnaha qolooyinka tiro badan ee ku xiran dawladda ama u dhow qabiilka Siad Barre. Dadka kalluumaysta ee Bajuni ayaa lagu khasbay in ay galaan iskaashatooyin dawli ah oo ay ugu badnaayeen qabiillada tiro badan waxaana sidaas kaga lumay qalabkoodii iyo habnololeedkoodii kalluumaysiga ee ay shakhsi ahaan u lahaayeen ama qoyskoodu lahaa.

Ka dib markii dawladdii Siyad Barre ay afganbiyeen ciidamadii mucaaradka ahaa sanadkii 1991kii, waxaa burburtay Jamhuuriyaddii Soomaaliya ee dib loo soo magacaabay, xadgudubyo culus oo ku saabsan xuquuqda insaanka iyo dembiyo dagaal ayay geysteen hoggaamiyeyaasha dagaal ee jabhadaha qabiil qabiil ku dhisan ee konfurta dalka. Waxaa burburay xarumihii dawladda, waxaa aad loo dundumiyey waddooyinkii iyo isku xireyaashii kale ee dalka, waxaana dalka gudihiisa ku barakacay dad rayid ah oo aad u farabadan iyo qaxooti farabadan oo u gudbay dalalka deriska ah iyo meelo ka shiisheeya. Waxaa qaskaas iyo waxshinimadaas ugu badnaan ku baaba'day ilaalintii qabiil qabiil ku dhisnayd ee caado loo lahaa, taasoo beelaha laga tirada badan yahay u sii halis galisay xadgudubyada iyo dembiyada ay geysanayeen xubnaha qabiilladu iyagoon laga soo jarin.[38]

Dhanka waqooyi galbeed sanadkii 1991kii, Dhaqdhaqaaqa Qaranka Soomaaliyeed (SNM) ayaa ku dhawaaqay xorriyadda gaarka ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliland oo iskeed isku taagtay. Markii ugu horraysay, beelaha laga tirada badan yahay ee magaalada Hargaysa (caasimada Soomaaliland) waxaa loo geysanayey dagaal, taasoo lagaga soo jarayey, faa'iidadii, ilaa xad ahayd, ee ay ka heleen nidaamyadii sinnaanta ee dawladdii Siad Barre, iyagoo qaarkood lagu daray cuntubyo gaar ah oo militarigiisa ka mid ahaa. Xubnaha qolooyinka xoogsada ee hore loogu oggolaaday in ay halkaas ganacsi ka furtaan oo ay guryo ka kiraystaan waa la garaaci jiray, waa laga saari jiray waxayna u qaxeen Itoobiya ama waxay degeen xaafadda heer hoose ah ee Dami ee magaaladda ku taalla.[39]

Hase yeeshee, weerarradaasi xoogaa ka dib ayay joogsadeen. Beelaha laga tirada badan yahay waxaa shan kursi looga qoondeeyey Aqalka Wakiillada iyo afar laga siiyey Golaha Sare ee Baarlamaanka taasoo waafaqsan Dastuur cusub, takhtar Gabooye ah ayaana loo magaacabay in uu noqdo wasiir ku-xigeenka caafimaadka.

Sanadkii 1998kii dhanka waqooyi bari, shir dhex maray isimo iyo siyaasiyiin ayaa si gaar ah looga dhawaaqay Maamulka Goboleed ee Buntland oo ah qayb xorriyad badan oo ka tirsan Soomaaliyada federaali ah, iyadoo loo sameeyey dawlad gudaha ku shaqo leh oo gaar ah, baarlamaan, xukuumad, waax caddaalad iyo nidaamyo kale, waxaana ku yaraa faragelinta dawladda federaaliga ah. Kumanaan qof oo ku barakacay colaaddii konfurta Soomaaliya ka dib 1991kii ayaa u cararay dakadda horumarka degdeg badan ee Boosaaso oo Buntland ka mid ah, iyagoo ay ku jireen dad farabadan oo Bantu ah iyo qolooyin kalo tiro yar.

Ka dib shirkii nabadda ee sanadkii 2000 la qabtay, waxaa la aasaasay baarlamaan ku meelgaar ah waxaana Dawlad Qaran oo Ku meelgaar ah (TNG) laga dhisay Muqdisho muddo saddex sanadood ah. Hase yeeshee, dawladda TNG gudaheeda ayuu khilaaf ka jiray waxayna awoodi weydey in ay aasaasto maamul qaran, militari iyo ciidaan booliis oo meel dhexe laga maamulo, ama nidaam kaloo xukuumadeed ama caddaaladeed. Meelaha qaar, waxaa ka soo baxay maxkamado Islaami ah oo aan rasmi ahayn iyagoo wata jabhado hubaysan iyo xabsiyo waxayna suurtogeliyeen amni xaafadaha qaar laga soo dhaweeyey.

Nidaamka qabiillada ku dhisan waxuu xubnaha qabiilka ugu deeqay badbaado yar, laakiin beelaha laga tirada badan yahay ee aanan haysan qabiil ilaaliya ayay waxyeello badan gaartay. Jabhaduhu waxay xukumeen qaybo dhul oo kaladuwan, iyagoo aanan laga jarin dembiyadooda, waxaana farabatay dadka la afduubo ee lagu weydiisto lacago farabadan.

Xerooyinka IDP, oo ay badi joogeen beelaha laga tirada badan yahay, xubnaha qolooyinka tiro badan ee hubaysan ayaa si caadi ah u noqday 'irrid ilaaliyeyaal', iyagoo degaanka looga yaqaannay 'mukulaal madow'. Marka ay xadaan caawimaadda ka timid hay'adaha caalamka (oo shaqaalahooda Soomaalidu ay ugu badnaan ka soo jeedeen qolooyinka tiro badan), waxay ku deeqayeen ilaalo hubaysan oo cunto lagu siin jiray.[40]

Ururrada NGO ee Soomaaliyeed qaarkood (oo ka shaqaynayey dhibaatooyin kaladuwan oo la xiriira xuquuqda iyo horumarka) ayaa ka aasaasmay konfurta dhexe ee Soomaaliya muddadaas qasku jiray, si ay uga soo horjeestaan quwadda hoggaamiyeyaasha dagaal oo ay isu dayaan in ay dib u soo celiyaan amniga aasaasiga ah, xuquuqda insaanka iyo habnololeedka.

Dawladda Federaaliga ah ee Ku meelgaar ah (TFG), oo ka dhalatay wadahadallo nabadeed oo la qabtay sanadkii 2004tii si loogu beddelo dawladda qaran ee TNG, ayaa iminka dawlad Soomaaliya u ah. Xeerkeeda Federaaliga ah ee Ku meelgaar ah, oo ah Dastuur ku meel gaar ah, waxaa ka kooban qodobbo muhiim ah oo khuseeya xuquuqda insaanka iyo xeerka maamulka, inkastoo aanan si cad loogu soo hadal qaadayn xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay. Hase yeeshee, dawladda federaaliga ah ee TFG xukun ku filan kuma hayso qayb dalka ka mid ah awoodna uma leh in ay hirgeliso qodobbadaas.

Baaritaannada caalamku hadda ka fiirsanayo ee lagu samaynayo dembiyada dagaal iyo dembiyada liddi ku ah insaanka ee ay geysteen qolooyinka kaladuwan ee colaaddu ka dhex martay Soomaaliya sanadihii ugu dambeeyey waxay u badan tahay in lagu daro dembiyada loo geystay beelaha laga tirada badan yahay.

## Benadiri

Koox labaad ee qolooyin tiro yar ayaa ka timid beelaha baayacmushtarka ee magaalooyinka ee ay dhisteen muhaajiriin waqtiyo kaladuwan (qaarkood ilaa 1,500 sano ka hor) ka yimid meelaha iminka ah Sacuudi Carabiya, Yaman, Cummaan, Iraan iyo India. Waxay degeen 'xeebta Banaadir' iyo tuulooyinka dhulka gudihiisa,[41] waxayna dhisteen tuulooyin guryo dhagax ah si ay isu diffaacaan oo ay ganacsi u samaystaan, iyagoo gacan weyn ka geystay fidinta Islaamka. Waxay la falgaleen qabiillada degaanka (xoolo dhaqata iyo Rahanweyn), iyagoo sii haystay qaar ka mid ah sifooyinka gaar u ah.

### Qaybaha Banaadiri

Qolooyinka Banaadiri waxaa ugu badnaan ka mid ah beelaha soo socda.[42]

- Reer Xamar, oo ku nool Muqdisho (waqtigii Xorriyadda la helay qiyaas ahaan shacabka nuskii ayay ahaayeen), oo ka dhigan 'qabiilka'[43] Xamar (magac kaloo loo yaqaanno Muqdisho), iyagoo leh lahjad u gaar ah ee luqadda Soomaaliga (Af-Hamar), waxayna u kala baxaan qaybo ama 'jilibyo' kaladuwan oo farabadan.
- Degganeyaasha dakadda Marka (oo ahayd 'caasimadda' xeebeed qarnigii saddex iyo tobanaad), oo mararka qaar loo yaqaanno Reer Marka, iyagoo leh lahjad u gooni ah ee Soomaaliyeed (Af-Donte) oo ku xiran Af-Maaymaay ee qabiillada Rahanweyn ee degaanka.
- Barawaani, ku nool magaalada xeebta ee Baraawe, iyagoo leh sifooyin taariikheed iyo dhaqan magaaleed oo qayb ahaan u gaar ah kuwaasoo ka yimid qarnigii lix iyo tobanaad markii Baraawe (oo la dhisay qarnigii sagaalaad) ay ahayd dakad ganacsi oo muhiim ah oo is maamusha waxayna ka hortageen weerarradii Burtaqiiska. Qarnigii sagaal iyo tobanaad, Baraawe waxaa loo aqoonsaday xarunta degaanka ee cilmibarashada, tacliinta, faafinta diinta iyo aqoonta sharciyeed ee Suufinimada Islaamka. Barawaanidu waxay ku hadlaan Shimini oo u ah luqadda hooyo (iyadoo weliba loo yaqaanno Shimbalasi), taasoo ah

lahjad Kiswahili oo degaanka lagaga hadlo, iyo weliba lahjadda jilibka Tunni ee Af-Maaymaay.

- Bajuni, beel kalluumaysata oo darajo hoose saboolna ah iyagoo ku nool dakadda konfurta ee Kismaayo iyo jasiiradaha badda ee Bajuni ee u dhow xuduudda Kenya.[44] Waxay awooweyaal fog ku leeyihiin konfurta bari ee Aasiya taasoo ka timid xirirradii ganacsiga ee qarniyo ka hor u dhexeeyey xeebta Soomaaliyeed iyo Shiinaha iyo konfurta bari ee Aasiya. Waxay ku hadlaan Kibajuni, lahjad Kiswahali oo degaanka lagaga hadlo, iyadoo u ah luqadda hooyo.

Qolooyinka Banaadiri waxay luqadda Soomaaligu u tahay luqad labaad waxa keliya ee qaranka loogu aqoonsadaana waa ahaanshahooda muwaadiniin Soomaaliyeed. Tan iyo sanadihii 1950nadii, qolooyinka Banaadiri waxay ku soo jireen siyaasadda qarannimada iyagoo xisbiyo u gaar ah lahaa, kuwaasoo mararka qaar ku xirnaa xisbiyada qabiillada kale. Qabiillada kale ee xoolo dhaqatada iyagu kuma ay xirnayn ama kuma ay dhex jirin si ay kuwaasi u ilaaliyaan, mana qabin ka durugsanaanta bulshada iyo kalasooca ay qabeen dadka Bantu iyo qolooyinka xoogsada.

Muddadii dagaalladii sokeeye ee ka dambeeyey 1991kii, waxaa dhinaca kale u rogmatay darajadii hore u mudnaanta lahayd ee qolooyinka Banaadiri, iyagoo qaar badani ay ahaayeen ganacsadeyaal qani ah, maxaa yeelay ma ay samaysan jabhad hubaysan oo ay isku ilaaliyaan. Waxyeello badan ayaa Reer Xamar ka soo gaartay weerarrada jabhadaha hoggaamiyeyaasha dagaal; iyagoo guryahooda iyo dukaannadooda dhacayey; xadayey dahabka haweenka; kufsanayeyna gabdhaha iyo haweenka. Qolooyinka Banaadiri intooda ugu badan waxay u qaxeen Kenya iyagoo qaxooti noqday. Dhowr kun ayaa weli ganacsigooda ka wata Muqdisho, Baraawe iyo Marka, iyagoo jabhadaha qabiillada lacag siiya ama ay u shaqeeyaan rag hubaysan si ay isku ilaaliyaan.[45]

Dadka kalluumaysta ee Bajuni waxay weli joogaan magaalada dakadda leh ee Kismaayo iyo Jasiiradaha Bajuni, inkastoo dagaalka sokeeye ay uga yimaaddeen weerarro iyo bililiqaysi ay u geysteen jabhadaha hubaysan ee Kismaayo, halkaasoo ay isku soo dagaalayeen jabhadaha qabiillada iska soo horjeeda tan iyo 1991kii.

## Qolooyinka xoogsada[46]

Qolooyinka xoogsada waa koox ka kooban qolooyin tiro yar oo gaar ah oo u kala baxa saddex kooxood oo ugu muhiimsan oo ku nool shaqooyin gaar ah oo aan xoolo dhaqasho ahayn iyo farsamada,[47] iyagoo daruuri u ahaa dhaqaalaha dadyowga guura. Waxaa iyaga laga helaa dhammaan dhulka Soomaaliyeed; Soomaaliland gudaheeda, waxay yihiin qolada tiro yar ee ugu weyn.[48]

Xubnaha qolooyinka xoogsada ma leh muuqaal ka duwan qabiillada xoolo dhaqatada ah ee ay la noolaayeen loomana arko in ay leeyihiin asal qalaad ama aanan Soomaali ahayn. Waxay ku hadlaan lahjadaha degaanka ee luqadda Soomaaliga.

Saddexda kooxood ee ugu muhiimsan waxay yihiin Midgaan (keli ahaan Midgaan, jamac ahaan Midgo), oo weliba loo yaqaanno Gabooye Soomaaliland dhexdeeda,[49] iyagoo caado u lahaa ugaarsiga iyo ka shaqaynta saanta laakiin waxay weliba qaban jireen shaqooyin farsameed oo kaladuwan iyo gudniinka wiilasha iyo gabdhaha; Tumaal, oo caado u lahaa shaqada biro sancaynta; iyo Yibro (keli ahaan Yibir, jamac ahaan Yibro) oo caado u lahaa ku takhasusidda dhaqanka.[50]

Shaqooyinkii caadada loo lahaa qaarkood ayaa lumay bartamihii/dhammaadkii qarnigii labaatanaad. Dadka Yibro, tusaale ahaan, iminka kama faa'iido heli karaan dakhligii mar iyaga ugu badnaa ee samanyo ee lacagaha dhalmada iyo arooska ee ay ka heli jireen qolooyinka 'bilis' (oo loo siin jiray ducada), maxaa yeelay waxaa caadadaas mamnuucday dawladdii Siad Barre horraantii sanadihii 1970nadii iyadoo lagu tilmaamay mid 'qabyaali ah'.

Tirada yar ee xubnaha qolooyinka xoogsada ee wax bartay waxay qabtaan shaqo ah nooca ay rabaan, laakiin intooda ugu badan waxay shaqo ka helaan waaxyaha muruqmaal iyo adeegidda, sida dadka suuqa wax ku iibiya iyo ganacsatada; hilibleyaasha, shaqada guryaha, cunto karinta iyo iibinta shaaha. Hase yeeshee, iminka keli kuma aha hawlaha ay caado u lahaayeen (meelaha ay kuwaasi weli ka jiraan), waxaana badi ku adkaatay in ay shaqo kale helaan.

Markii uu ka lumay habnololeedkii caadada u ahaa, iyo colaadda jirtay ayaa keenay in qaar farabadani ay u guuraan dhul magaaleed ama xerooyinka IDP ama in ay u qaxaan xerooyinka qaxootida ee dalalka deriska ah.

Iyadoo wax fiican ah, dhowr fannaaniin oo caan ah ayaa ka soo jeeda qolada xoogsata ee Midgaan, waxaana xushmeeya oo jecel beelaha qolooyinka tiro badan.[51]

## Beelah laga tirada badan yahay ee diimeed

Ka sokow beelaha laga tirada badan yahay ee bulsho iyo dhaqameed ee dhanka hore ku xusan, waxaa mararka qolooyin tiro yar loo arkaa labada beelood ee yar yar ee diinta Muslinka haysta – Ashraf iyo Shekhal – ee iyaga loo geystay xadgudubyo la xiriira jinsiyadda ama xuquuqda insaanka. Waxaa weliba jira qolo tiro yar oo Soomaali Kiristan ah iyagoo ka kooban shakhsiyaad ama beelo Soomaaliyeed oo waalidkood ama iyagu ka tagay diinta Islaamka oo Kiristan noqday, iyagoo qaarkood ay is qariyaan.

Diinta ugu badan Soomaaliya ee ay guud ahaan Soomaalida dhammaantood haystaan waa Islaamka Sunniyiinta ee Shaafici ah. Waxay taariikh ahaan taasi

ahayd wax mideeya horumarka mujtamaca Soomaaliyeed ee tan iyo faafiddii Islaamka ee dhammaadkii kunbuuxii ugu horreeyey. Habdhismeedka gaarka ah ee diinta Islaamka, ee meelaha kale ka jira, ayaa keenay in ay degaannada qaarkood ka dhashaan noocyo gaar ah.

### Ashraf iyo Shekhal

Dadyowga Ashraf iyo Shekhal waxay caado u lahaayeen in ay kaalin muhiim ah ka galaan xallinta khilaafaadka, waxaana xushmayn jiray oo ilaalin jiray qabiillada ay la nool yihiin. Hase yeeshee, qaarkood waxaa si xun u taabtay colaadihii sokeeye ee 1990nadii waxaana ka luntay ilaalintaas caado u ahayd, iyagoo ay abbaarteen jabhadaha iyo hoggaamiyeyaasha dagaal ee qabiilladu si ay ugu xadgudbaan xuquuqdooda insaanka.

Dadka Ashraf waxay sheegtaan in ay ku abtirsadaan Nabi Maxamad iyo gabadhiisa Faatima, waxayna aamminsan yihiin in ay Soomaaliya u soo haajireen qarnigii laba iyo tobanaad. Dadka Ashraf ee jooga qaybaha dalka qaar ka mid ah waxay ku xiran yihiin oo loo arkaa qolooyinka Banaadiri, inkastoo dadka Ashraf ee ku dhex nool dadka Digil-Mirifle ay iyaga ugu xiran yihiin jilib ahaan. Shekhal (oo weliba loo yaqaanno Sheikhal ama Sheikash) ayaa ah beel diimeed oo midda hore la siman oo dalka ku kala daadsan iyagoo sheegta in ay asal ku leeyihiin Carabta iyo dadkii Islaamka ahaa ee ugu horreeyey.

Labada dadyow ee Ashraf iyo Shekhal waxay gaareen heer ay raad ugu yeeshaan siyaasadda dalka waxayna guul ka gaareen waxbarashada iyo ganacsi ay la galaan waddamada Carabta, haddana waxaa weli ku soo wajahi kara kalasooc iyo xadgudubyo loo geysto xuquuqdooda insaanka oo sabab ay u yihiin asalkooda qabiilka aanan ahayn iyo la'aantooda jabhad hubaysan. Sanadkii 2006dii, tusaale ahaan, xafiiska OCHA ayaa muujiyey xaaladda dhowr boqol oo qoys oo Shekhal ah oo barakac ku tagay Itoobiya iyagoo kaalmayn caawimaad ah u baahan.[52]

### Kiristanka

Ilaa waqtigii Midowga Maxkamadaha Islaamiga ah (ICU) ay la wareegeen xukunka qaar ka mid ah qaybaha konfureed ee dalka ka dib 2006dii, waxaa guud ahaan la isaga dul qaadan jiray tirada yar ee Kiristanka Soomaali ah, iyagoo si furan kanisadaha ugu cibaadaysan jiray, inkastoo soo dhawaanshaha ergayda Kiristanka aanan rasmi ahaan la oggolayn.

Xeerkii dawladda TFG ee sanadkii 2004tii ayaa ku dhawaaqay in diinta Soomaaliya ay tahay Islaamka. Kaasi laguma xannibin caqiidooyinka kale, laakiin intiisa ugu badan laguma aqoonsan xaqa loo leeyahay xorriyadda lagu doorto iimaanka. Kiristanku wakiillo kuma leh Baarlamaanka Federaaliga ah ee Ku meelgaarka ah (TFP) ama waax kaloo dawladda ka mid ah oo iyaga lagu badbaadin karo.

Xarakada hubaysan ee al-Shabaab, oo iminka xukuma ugu badnaan konfurta dhexe ee Soomaaliya, waxay ku dhaqmaan fasirashadooda aad u daran ee Shariicada Islaamka,[53] waxaanay abbaarteen dadka iyagu taas dhinac ka noqda iyagoo ku dhaqma caqiidooyinka iyo caadooyinka Islaamka Soomaaliyeed, Kiristanka ama Afrikada asalka ah (Bantu iyo Goosha). Inkastoo Islaamiyiinta asal raaca ah ay sheegeen in aanay dadka beel beel u kala saarin, haddana beelaha laga tirada badan yahay ee Banaadiri, Bantu iyo Kiristanka ayaa lagu abbaaray caddibaadda diinta ku salaysan. Si aad u hesho warbixin dheeraad ah oo ku saabsan caddibaadda Kiristanka, fiiri qaybta ku saabsan konfurta dhexe ee Soomaaliya.

## Ugaarsatada

Aweer (oo weliba loo yaqaanno Boni) ayaa ahaa beeshii keliya ee waqtiyadan dambe ugaarsata Soomaaliya dhexdeeda, laakiin waxay u muuqataa in aanay iminka Soomaaliya ka jirin ama ay aad ugu yar yihiin, taasoo ka timid dhexgalkooda qabiillada degaanka; macaluul iyo dilka ay u geysteen jabhadaha hoggaamiyeyaasha dagaal; ka haridda habnololeedkii caado ay u lahaayeen; iyo barakac ay ku tageen Kenya sanadihii 1990nadii si ay ugu noolaadaan degmada xeebta ee Lamu.[54] Cilmibaareyaasha MRG waxay Soomaaliya ka waayeen war laga hayo dadka Aweer (inkastoo qaarkood lagu sheegay in ay weli ku nool yihiin[55] degaanka Hola ee degmada Badaade ee konfurta Soomaaliya).

Waagii hore, beesha Aweer ee aad u tiro yar waxay ku noolaayeen qaybaha kaynta ah ee ku siman webiga Jubba. Qaar farabadan ayaa magaalada Baraawe ku noqday dad IDP ah oo barakacay. Waxay ku hadlayeen luqad Kushiti oo u gooni ah. Dadka Aweer waxay sheegan kari lahaayeen in ay yihiin dadka dhulka loogu yimid iyagoo ku abtirsada dadkii ugaarsatada ahaa ee ugu horreeyey gobolka ee iyagu lahaa habnololeed dadkan la siman, inkastoo darajadaas aanan weligood looga aqoonsan Soomaaliya dhexdeeda. Dadka Aweer waxay ka mid yihiin 42 qolo oo Kenya looga aqoonsaday in ay yihiin dad dhulka loogu yimid.[56]

Dadka Eyle waxay yihiin qolo xoolo dhaqato ugaarsata oo gooni ah, tirana yar iyagoo ah beel tiro yar oo gaar ah. Waxay ku nool yihiin tuulooyin ku yaalla qaybaha u dhexeeya webiyada. Waxaa la soo sheegay in ay gaarayaan 12,000 oo qof oo ku kala nool afar tuulo oo ku yaalla Gobolka Shabeellada Dhexe, iyo tiro ka yar oo ku nool dhul Muqdisho ku yaalla oo la dejiyey dadka IDP ah. Waxay gooni uga yaallaan dadka kale, qaar dhif ah ayaa waxbarasho soo qaatay, waxaa waxyeelleeya qabiillada Rahanweyn ee degaanka, waana dad sabool ah oo dulmiyaysan. (Sidoo kale fiiri qaybta ku saabsan konfurta dhexe ee Soomaaliya si aad u hesho warbixin dheeraad ah oo ku saabsan xaaladda ay iminka ku sugan yihiin dadka Eyle).

# Dhibaatooyinka hadda ku wajahan beelaha laga tirada badan yahay

Beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliyeed wadajir – iyo xubnaha beelaha laga tirada badan yahay shakhsi ahaan – waxaa laga horjoogsadaa ama lagaga xadgudbaa dhammaan noocyada kaladuwan ee xuquuqda insaanka ee aasaasiga ah ee ku qayaxan heshiisyada caalamiga ah iyo kuwa goboleed sida Heshiiska Caalamiga ah ee ku saabsan Xuquuqda Sharciyeed iyo Siyaasiyeed (ICCPR), Heshiiska Caalamiga ah ee ku saabsan Xuquuqda Dhaqaale, Bulsheed iyo Dhaqameed (ICESCR), Heshiiska Ka soo horjeeda Silic-dilyada (CAT), Heshiiska Caalamiga ah ee ku saabsan Tirtiridda Dhammaan Noocyada Kalasooca ee ku salaysan Jinsiyadda (ICERD), iyo Xeerka Afrikada ee ku saabsan Xuquuqda Insaanka iyo Dadyowga (African Charter on Human and Peoples' Rights), kuwaasoo dhammaantood sharci ahaan qabanaya waddanka Soomaaliya.[57] Qaar farabadan oo ka mid ah xadgudubyada beelaha laga tirada badan yahay loogu geystay xaaladaha dagaal ayaa weliba liddi ku ah Heshiisyada Geneva iyo qodobbada kale ee sharciga insaaniyeed ee caalamka

## Hadallada neceyb ah

Dadka la waraystay, maragfurkii ay MRG u sameeyeen si warbixintan loogu isticmaalo, waxay iyagu badi ku soo hadal qaadeen ereyo ka mid ah hadallada neceyb ah, ee ka yimid akhlaaqda bulsheed iyo dhaqameed ee waxyeellaynta leh ee yasidda ah iyo dhaxalka addoonsiga. Waxay ka soo warbixiyeen in iyaga si caadi ah ay u aflagaadeeyaan xubnaha qabiillada tiro badan, iyagoo dadkaas ku xaqira darajadooda iyo aqoonsigooda qolo tiro yar. Dhowr xubnood oo ka mid ah dadka Bantu iyo beelaha laga tirada badan yahay ee xoogsada ayaa soo sheegay si joogto ah loo caayo loona yaraysto. Dadka Bantu waxaa weli loogu yeeraa addoon.

Darawal bas oo Bantu ah oo 40 jir ah kuna nool Muqdisho ayaa waxan soo socda u sheegay ururka MRG:

> *Waxaan ku nool ahay aqal yar oo cooshad ah oo laba qol leh. Nolol aad u adag ayaan ku nool ahay... Kalasooc badan ayaa naga haysta mujtamaca aannu ku dhex nool nahay* [taasoo ka dhigan in uu nooga yimaaddo qabiillada tiro badan, oo u badan Hawiye ee jooga Muqdisho]. *Dadka rakaabka baska ku ah way i caayaan. Marka ay doonayaan sabab ay iigu qayliyaan, baabuurka jooji bay i yiraahdaan marka aan marayno meeshii ay rabeen, oo maadaama uusan basku sidaa uun isku taagi karin, waxaan joogsadaa xoogaa ka dib halkii ay igu yiraahdeen joogso. Ka dibna caay iyo qaylo ayaa la iigu mayraa...Dadkayga kalmado caay ah ayaa loo sameeyaa waana la nacaa.*[58] *Mararka qaar, waxaan doorbidi lahaa in aan ku shaqeeyo kaariyoone* [anigoo xammaal ah]*, taasoo caadi u ah dadkayga jooga Muqdisho, si aan markaa iyaga ugala hadli karo dhibaatooyinkaas.*[59]

Beelaha laga tirada badan yahay ee naafonimo qaba waxaa ku wajahan noocyo kaladuwan oo kalasooc ah. Haweeney joogta Buntland waxay cilmibaaraha MRG ku tiri:

> *Waxaan ka soo jeedaa qolo tiro yar waanan naafaysan ahay. Aflaagada maalinwalba aan la kulmo inta ay leeg tahay looma dulqaadan karo. Noloshaydu sideeda kale ayayba isaga adag tahay mana aha in ay dadku igu caayaan Tumaalka aan ahay iyo naafonimadayda.*

Qodobbada 19aad iyo 20aad ee ICCPR[60] iyo Qodobka 9[aad] ee Xeerka Afrikada ee ku saabsan Xuquuqda Insaanka iyo Dadyowga[61] waxay ku toosan yihiin hadallada neceyb ah. Waa in Soomaaliya ay ku dhaqaaqdo in ay soo saarto shuruuc lagu mamnuucayo taageerada neceybka ku salaysan isirka, jinsiyadda ama diinta ee qaranka ka hirgala ee lagu dhiirrigelinayo kalasooca, kahridda ama rabshadda. Mustaqbalka, masuuliyiinta dawladdu waa in ay ku dadaalaan in ay dib u eegaan oo ay isku hagaajiyaan shuruucda ku saabsan hadallada neceyb ah si loo hubiyo in ay kuwaasi waafaqsan yihiin xeerasha caalamka ee la oggol yahay.

Waa in si degdeg ah wax looga qabto sida ay masuuliyiintu ugu dulqaataan hadallada neceyb ah, marka la eego sababta weyn ee ay kuwaasi u yihiin xadgudubyada loo geysto sharafta shakhsi ahaaneed ee ku xusan tuduca soo socda.

Waa in weliba shuruucdaas la soo raaciyo nidaamyo iyo dariiqyo kaloo taxane ah, kuwaasoo gaar ahaan loogu talagalay in lagu kordhiyo qaybta ay beelaha laga tirada badan yahay ku leeyihiin dadweynaha iyo siyaasadda Soomaaliya; in lagu kordhiyo waxbarashada iyo aqoonta ku saabsan xuquuqda insaanka; in lagu ilaaliyo war-isgaarsiinta beelaha laga tirada badan yahay iyo beelaha; wadahadallada jinsiyadaha iyo diimaha kaladuwan; iyo xeer habdhaqan oo macne ku fadhiya lana hirgelin karo oo loo sameeyo xildhibaannada iyo hoggaamiyeyaasha siyaasadeed.

## Wakiillada siyaasadeed oo yar

Sanadihii 2000 iyo 2004tii, dawladaha TNG iyo TFG waxay midba iskood u ansixiyeen nidaamka xukun wadaagidda ee qabiilka ku dhisan ee loo yaqaanno 'hannaanka 4.5' ee wakiillada, kaasoo ah xeelad kalasooc ku dheehan yahay oo keenaysa in beelaha laga tirada badan yahay marka la isku daro ay u dhigmaan uun hal qabiil oo tiro badan nuskii: waxaa hannaankaas lagu simay wakiillada afarta qabiil ee tiro badan, waxaana beelaha laga tirada badan yahay gebi ahaan lagu siiyey qiyaas ahaan nus tirada kuraasta loo qoondeeyey reer kastoo qabiil tiro badan ah. Sidaas darteed, sanadkii 2000, 31 ka mid ah 225 kursi ee baarlamaanka (ama boqolkiiba 14) ayaa loo qoondeeyey beelaha laga tirada badan yahay; sanadkii 2004tii, markii tirada kuraastu ay kor u kacday ee ay gaartay 275, beelaha laga tirada badan yahay waxaa loo reebay qaybtoodii 31 kursi ahayd, taasoo tirada boqolleey ee wakiilladooda hoos u dhigtay oo ka dhigtay boqolkiiba 11.

Habka qaybinta kuraasta laguma matalayn tirada shacabka ama sida ay dhulka ugu kala qaybsan yihiin, taasoo aanan laga haynin macluumaad la isku hallayn karo; waxayse ahayd, mid siyaasiyiintu ay ka wada heshiiyeen oo ku salaysnayd waaxyaha dhaqameed ee Soomaalida. Qabiil kasta waxuu qaybtiisa kuraasta u kala qaybsaday jilib jilib ahaan iwm, halkii beelaha laga tirada badan yahay ay musharrixiintooda ka soo doorteen, iyadoo ay taas ka go'aan gaareen wakiillada ka kala socda beelaha laga tirada badan yahay ee kaladuwan, iyadoona wixii muran ah ay xalliyeen guddi dhexdhexaadin oo madaxbannaan.[62] Kuraasta boqolkiiba laba iyo toban waxaa loogu talagalay haweenka, inkastoo aanan tiradaas iyaga weligood la wada siinin.

Waxaa shaki ka yimid tirada iyo aqoonsiga beelaha laga tirada badan yahay. Ma jirin liis rasmi ah oo la isku tiirin karo, ama macluumaad si cad loogu tirakoobayo astaamaha beelaha ama shacabka. Ka sokow beelaha laga tirada badan yahay ee ugu muhiimsan ee hore loo soo tilmaamay, waxaa soo raacay dhowr 'qolo tiro yar ah' oo iskood isku soo taagay kuwaasoo ka soo jeeda qolooyinka 'bilis' laakiin aanan faa'iido ku lahayn tiro ahaan iyo siyaasad ahaanba halka ay ku nool yihiin oo markaas rabay in ay kaalintooda sare ugu qaadaan sheegashada darajadaas siyaasadeed ee beelaha laga tirada badan yahay ee cusub.[63] Inkastoo hannaanka 4.5 ay beelaha laga tirada badan yahay ku heleen ra'yi ay ku yeeshaan go'aannada siyaasadeed ee la gaaro, waxuu ahaa mid daciifsan oo ugu badnaan ka baxsan meelihii lagu ogaa in ay ku guuldarraysatay dawladda TFG, taasoo ku soo jirtay colaad iyo dhibaato joogto ah. Waxaa sidaas lagu suurtogeliyey in caalamku tixgeliyo xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay goorta dib u dhiska dalka laakiin ilaa iyo iminka raad badan kama hadhin.

Inta la soo saarayo Dastuurka dib isugu habaysan ee aakhirka beddeli doona xeerka TFC ee hadda waxaa si gaar ah loogu baahan doonaa in dib loo eego oo la beddelo hannaankaas, si loo hubiyo in beelaha laga tirada badan yahay ay yeeshaan wakiillo siyaasadeed oo waxtar leh. Hannaanka waxaa cambaareeyey aqoonyahannada iyo u halgameyaasha beelaha laga tirada badan yahay iyagoo ku tilmaamay in uu muujinayo 'kalasooca waadaxa ah ee jira iyo quursiga daran ee jinsiyadeed' (oo ku salaysan qiyaasaha qaladka ah ee loo haysto in ay tiradoodu tahay) iyo in uu diiddan yahay cabashooyinkii waqtigaas ay sameeyeen beelaha laga tirada badan yahay.[64]

Hannaanka 4.5 iyo nidaamka loogu qaybiyey kuraasta ayaa weli la adeegsadaa, laakiin, dhammaadkii 2008dii, dawladda TFG iyo isutag ka kooban kooxaha mucaaradka ah, oo la yiraahdo Ururka Dib u xoraynta Soomaaliya (ARS), ayaa ku heshiiyey in ay kordhiyaan tirada kuraasta baarlamaanka oo ay ka dhigaan 550, iyadoo kuraasta cusub 200 ka mid ah loo qoondeeyey ururka ARS 75-na la siiyey ururrada mujtamaca raydka ah.[65] Tirada kuraasta ee loo qoondeeyey beelaha laga tirada badan yahay waa la labalaabay oo waxaa laga dhigay 62, taasoo ka dhigan in qaybta ay halkaas ku leeyihiin ay weli tahay boqolkiiba 11.[66]

## Mamnuucidda is-guursiga qolooyinka

Inkastoo ay caado ahayd in qabiilladu ay mamnuucaan guursiga qolo tiro yar, haddana waxay taariikhdu muujinaysaa in la filanayo in xiriirrada noocaas ahi ay weligoodba soo jireen, iyagoo qarsoodi ah hadday ugu yaraato, inkastoo ay dhif yihiin. Xannibaaddaas saaran isguursiga qolooyinka ayaa beelaha laga tirada badan yahay u diidday noocyada taageerada qabiilka ama horumarka ee ku timaadda xirirrada guurka.

Waxaa halkan hoose ku qayaxan arrin loo soo sheegay cilmibaareyaasha MRG oo ku saabsan guur laba qolo dhex maray oo ka dhacay Soomaaliland sanadkii 2009kii, goortaasoo nin qolo tiro badan ka soo jeeda iyo gabadh qolo tiro yar ay samaysteen xiriir qarsoodi ah ayna isguursadeen, taasoo keentay cadowtinimo badan ka timid qabiilka ninka.[67]

> *Noloshayda ayaan khatar geliyey. Waxaan ahay Madhibaan waxaanan guursaday nin Isaaq ah qiyaas ahaan hal bil ka hor. Waannu ogayn halista aannu ku sii soconnay laakiin waxaannu go'aansannay in aannu baxsanno oo aannu isku guursanno meel ka fog tuuladayada. Waxaannu imannay Gabiley reerka ninkayga ayaana dhib noo keenay. Waxay ninkayga ku khasbeen in uu i furo anigana waxaa i garaacay qaar ka mid ah qaarabadiisa. Dhalo inta ay ciid ka buuxiyeen ayay*

*madaxa igala dhaceen. Waxay u haysteen in aan anigu dhibaatada wado, oo aan wiilkooda kexeysanayo. Dhaawac xun ayaa i gaaray waxaana reerkayga khasab ku noqotay in ay isbitaalka i geeyaan. Duqayda ayaa kulantay waxaana la i siiyey magdhaw. Way caddayd waxa ay rabeen: 'Madhawgaaga qaado oo wiilkayaga iska ammaan geli'. Waxaa naloo arkaa dad ka hooseeya dadka kale mana jirto cid rabta in ay na guursato.*

Xaaskii Madhibaan ahayd ee ninkeeda khasab looga furay waxay cilmibaaraha MRG tustay nabarradii ka soo haray dhaawicii madaxa looga geystey. Waxay sheegtay in aanay dulmigaas u sheegin booliiska, 'maxaa yeelay qofka dhaawaca ii geysta iyo qofka aan u cabanayaaba waxa ay ka soo jeedaan isla qabiil keliya'.

Haweeney Ogaadeen ah oo ku nool xero IDP oo Muqdisho ku taalla ayaa ka hadashay dhacdada soo socota:

*Waxaan aqaannay gabadh ka soo jeedda qabiilka Hawadle oo guursatay nin Midgaan ah. Waxay deris ku ahaayeen Beledweyne* [bartamaha Soomaaliya] *laakiin reerkeegu ma oggolayn ninkan ay doorotay. Waxay leedahay shan carruur ah: saddex wiil iyo laba gabdhood. Waalidkeedu iminka iyada uma arkaan gabadhoodii oo way ka jareen wixii xiriir ahaa. Waalidkeeda way jeceshahay oo waxay rabtaa in ay iyaga soo booqato laakiin waxay ka baqaysaa in ay iyada ku waxyeelleeyaan ninka ay doorotay. Markii uu arkay dhibka ay ku jirto, ninkeedii oo jeclaa ayaa iyada furay si uu 'sharafteeda ugu celin karo'.*

## Shaqada

Maadaama xoogaa ka mid ah beelaha laga tirada badan yahay ay waxbarasho fiican qaateen, marka laga reebo kuwii ay u suurtogashay in ay dalka ka baxaan, dadkaasi ma haystaan xirfadaha ku habboon ugu badnaan fursadaha shaqada ee casriga ah. Taas maxaa dheer, xubnaha qabiillada tiro badan ayaa iminka raadiya shaqooyinka muruqmaalka ah ee hore loogu ogaa beelaha laga tirada badan yahay iyagaana badi laga doortaa beelaha laga tirada badan yahay. Haweeney Gabooye ah oo ku nool Soomaaliland ayaa cilmibaaraha MRG ku tiri:

*Isaaqa weligood shaqo kama heli doontid wayna marwalba ku caayi doonaan oo waxay yiraahdaan, 'Maxaad waalidkaaga ugu eegaysaa lacagta badan ee ay ka bixiyaan waxbarashadaada aadan wax ku heli doonin? Maxaad guriga u joogi laadahay oo aad hooyadaa u caawin laadahay?'*

Sahamin ku saabsan xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay oo sanadkii 2006dii uu qabtay Ururka Codka Haweenka Beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliland (VOSOMWO)[68] ayaa lagu soo ogaaday in reeraha Gabooye, Tumaal iyo Yibir ay ku nool yihiin lacag ka yar hal doollar oo Maraykan ah maalintii. Qiyaas ahaan nus dadkii la soo waraystay ayaanan shaqo haynin.

### Arrimaha la xiriira luqadaha beelaha laga tirada badan yahay

Luqadda Soomaaligu waxuu leeyahay lahjado u gaar ah gobollada kaladuwan. Lahjadaha ugu waaweyn waa Af-Maay (ama Af-Maymay), oo ah luqadda ku badan konfurta, iyo Af-Maxaa (ama Af-Maha), oo lagaga hadlo Soomaaliya inteeda kale, iyadoo lahjado ka yara duwan lagaga hadlo Soomaaliland iyo Buntland. Labada lahjadoodba waxay ahaayeen luqadaha rasmi ah ee dalka ilaa sanadkii 1972kii, markii dawladdu ay go'aamisay in Af-Maxaa uu noqonayo luqadda rasmi ah ee wax lagu qoro ee Soomaaliya. Go'aankaasi waxuu dadka ku nool konfurta, sida Bantu, ka sii durkiyey oo uu ku sii adkeeyey ka qaybqaadashada siyaasadda Soomaaliyeed ee caadiga ah, adeegyada dawladda iyo tacliinta.[69]

Luqadda Mushuuguli ee dadka Bantu waxaa inta badan soo dhawray beelo Goosha ah oo gaar ah. Inkastoo luqadda ugu muhiimsan ee banka Webiga Jubba ay tahay Af-Maay, qaar ka mid ah Bantu ee ku nool tuulooyinka baadiye ayaanan fahmayn. Waxay markaa ku hadlaan luqado qabiil qabiil u kala duwan oo ay ka soo dhaxleen awooweyaashood, sida Kizigua, iyadoo Sawaaxili mararka u yahay luqad ka dhexeysa.[70]

Laba qolo oo Banaadiri ah oo leh hidde iyo dhaqan u gaar ah ayaa ku hadla lahjado Sawaaxili ah: Barawaanida Baraawe waxay ku hadlaan Shimini (oo weliba loo yaqaanno Shimwini ama Shimbalasi), dadka Bajuni-na waxay ku hadlaan Kibajuni. Qolooyinka xoogsada waxay ku hadlaan af Soomaaliga caadiga ah noociisa halka ay ku nool yiihin. Tumaal iyo Yibro, iyo weliba Eyle, waxay ku hadlaan lahjadda af Soomaaliga ee qabiilka ay ku xiran yihiin, halka Midgaha iyo Yibro ay iyaguna ka leeyihiin lahjad gaar ah oo qabiillada tiro badan ee Soomaaliya aanay fahmayn.[71]

Xuquuqda luqadda khuseeya waxay qayb muhiim ah ka yihiin xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay. Qaar farabadan oo ka mid ah beelaha laga tirada badan yahay, waxay luqaddoodu u tahay qayb lagama maarmaan ah oo ka mid ah aqoonsigooda iyo dhaqankooda. Guddiga Xuquuqda Insaanka iyo Dadyowga ee Afrika ayaa qodobkaas u aqoonsaday dacwado lagu soo oogay dalka Mauritania. Guddigu waxay oggolaadeen in:

*Luqaddu waxay qayb lagama maarmaan ah ka tahay habdhismeedka dhaqanka; waxay dhab ahaan u tahay udub iyo habka ugu fiican ee lagaga hadli karo. Isticmaalkeedu waxuu hodmiyaa shakhsiga waxuuna isaga u rukhseeyaa in uu qayb firfircoon ku yeesho bulshada iyo waxqabadyadeeda. Marka qofka loo diido ka qayb qaadashadaas waxay taasi ka dhigan tahay in isaga loo diiday aqoonsigiisa.*[72]

Qodobka 4.3 ee Bayaanka Qaramada Midoobay ee ku saabsan Xuquuqda Dadka Ka soo jeeda Qolooyinka ku tiro yar Qaranka ama Jinsiyadda, Diinta iyo Luqadda (UNDM) waxuu dhigayaa in 'Dalalku ay qaadaan tallaabooyinka habboon si, marka ay suurogal tahay, dadka ka soo jeeda beelaha laga tirada badan yahay ay u heli karaan fursado ku filan oo ay ku bartaan afkooda hooyo ama in wax loogu sheego afkooda hooyo'.

# Xadgudubka xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay ayadoo loo eegaayo gobol ka gobol

Xaaladda beelaha laga tirada badan yahay wuu kala duwan yahay markii loo eego aagaha juquraafi ay ku nool yihiin – ayadoo u dhexeeyo dawladda *is-xorriyeysey* ee Soomaaliland ee waqooyi-galbeedka, oo xorriyad sheegatey ka dib markii la rogey xukunkii Siad Barre 1991 (laakin ay dalalka caalaamka weli aqoonsanin); Buntland, waqooyi-bariga, oo sheegtay inay is-maamuleyso iyo noqotey gobol federaal ah ee dalka Soomaaliya 1998; iyo koonfurta-dhexe ee Soomaaliya, gobol ku jiro dhibaato insaan joogta ah, kuna yaalo magaalo-madaxa rasmiga ee dalka, Muqdisho. Ayadoo la eegaayo kala duwanaanta xuquuqda insaanka ee ka dhexeeyo goboladaan, warbixintaan wuxuu baaraaya xaaladda beelaha laga tirada badan yahay markii loo eego gobol ka gobol.

## Soomaaliland

Ogaanshada iyo wax ka qabadka xuquuqyada qolooyinka tiro yar wuu ka sii horumarey Soomaaliland (gaar ahaan sanadaha ugu dambeeyey) markii loo bar-bardhigo koonfurta-dhexe Soomaaliya iyo Buntland. Gobolka waxuu caan ku noqdey nabadda ka jiro, horumarka dimuqraadiga ay ku jiraan doorasho xisbiyo kala duwan leh, iyo halganka mujtamaca shacbiga. Xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay sida VOSOMWO iyo Ururka Wanaagga Bulsheed ee Ubah (USWO), ayaa si tartiib ah ugu horumarey jaaliyadaha beelaha laga tirada badan yahay oo dhaqan ahaan hoggaamin jirey sultaan ama odoyaasha qabiilka.

Dastuurka Soomaaliland ee Maajo 2001, qaybta 8.1 wuxuu sheegayaa 'waa in dhammaan muwaadiniinta Soomaaliland helaan isla xuquuqyo iyo waajibaad markii loo eego sharciga iyo la kala siinin mudnaansho markii loo eego midabka jirkooda, qabiilkooda, dhalashadooda, luqadooda, lab ama dhiddignimadooda, hantidooda, heerkooda, ra'yigooda, iwm. Markii la hoos yimaado qaybta 8.2, 'waa mamnuc in la sameeyo mudnaansho iyo kalasooc ku salaysan jinsiga, qabiilka, dhalashada iyo deganaanshada; iyo isla markiiba, barnaamjyada loogu talagaley in lagu joojiyo dhaqanka xun ee waqtiga dheer socdo waa inay noqdaan waajibaad qaraneed'. Qof khabiir ku ah sharciga Soomaaliland Ibrahim Hashi Jama wuxuu aaminsan yahay in qaybtaan ka mid ah dastuurka u xiriir la leeyahay 'wax-qabadyo dhaqan oo keeni jirey kalasooc iyo/ama bilow kalasooc ayadoo la tiirsanaayo sababaha mamnuuca ah ee ku qoran shardiga' iyo 'wuxuu si hubaal ah u daboolaa la dhaqanka beelaha laga tirada badan yahay, sida Gabooye, iwm.'[73]

Hase-yeeshe, ma jiro sharci gaar u ah ka hortagga kalasooca.

Hase-yeeshe, horumarka waxaa xad u noqdey wax-qabad la'aanta dawladda, guul-darreysiga habka sharciga, falka yar ay qabteen Xuquuqda Insaanka Qaranka ee Soomaaliland, akhlaaq-xumada ay dawlada ku qabto gaar ahaan dadka difaaco xuquuqda aadanaha,[74] iyo akhlaaqda iska-naceebka bulshadeed ee adag oo ay qabaan xubinada qabiillada wayn.

Waxaa kaas dheeraad u ah, Soomaaliland wuxuu noqoshada muwaadin Soomaaliland ku xiraa qayb-ka ahaanshada qabiillada la tixgeliyo inay ka yimaadeen gobolada Soomaaliland; rasmi ahaan dawladda Soomaaliland wuxuu shacbiga ka socda Buntland ama koonfurta-dhexe ee Soomaaliya ula dhaqmaa sida inay yihiin 'ajnabi'.[75]

Doorashada baarlamaanka 2005, Aqalka Wakiilada wuxuu xushtay inuu ka saaro shanta jago ee la siin jirey beelaha laga tirada badan yahay sababtoo ah wuxuu yiri inuusan xiriir la leheyn Dastuurka, oo ballanqaado in dhammaan muwaadanka ay siman yihiin (sabatoo ah, wuxuu sameeyaa kalasooc kaasoo ka soo horjeedo qaybta 8 ee dastuurka oo sheegaayo inuusan koox bulshadeed la doonaynin 'in mudnaansho' laga siiyo koox kale). *Gurti* (odeyaalka qabiilka oo aan la soo dooran ee aqalka sare) way diiden doorashadaas 2007 laakin waxay ogolaadeen doorashada labaad oo la qabtey 2009.[76] Maadaama aysan qabin wikiil siyaasadeed iyo inkastoo heerkooda aqoonta uu hooseeyo iyo fursaddooda shaqo-helidda xun yahay, xubino yar ee ka mid ah beelaha laga tirada badan yahay ayaa awoodo inay caan ama hoggaamiyayaal noqdaan.

### Kalasooca waxbarashada

Tiro yar ee ka mid ah qolooyinka tirada yar (iyo gaar ahaan gabdho ka tiro yar wiilasha) ayaa wax-barta. Sahaaminta beelaha laga tirada badan yahay ee VOSOMWO oo la qabtey 2006 wuxuu sheegayaa in boqolkiiba 20 oo kaliya ee carruurta qoysaska la wareystey waxbarasho helay ama dugsi tega.[77] Markii waalidkii laga codsadey sababta ay carruurtooda dugsiga u geyn waayeen,

boqolkiiba 39 waxay eedeeyen 'deegaanka kalasooca leh ee ka dhexeeyo ardeyda dhallinyarada ah iyo dugsigaba'; boqolkiiba 47 waxay eedeeyeen saboolnimada iyo kalasooca ay carruurtooda kala kulmeen dugsiga; iyo boqolkiiba 13 waxay dareemeen inuu waqti-lumis yahay in carruurtooda u diraan dugsi sababtoo ah xittaa markii ay shahaado qataan loo ogolaan doonin inay qabtaan hawlo kale aan ka eheyn kuwa ay beelaha laga tirada badan yahay dhaqan ahaan u qabtaan. Daraasadda waxaa lagu ogaadey in badanaa ardeyda iyo macallimiinta u dhashey beelaha laga tirada badan yahay, kalasooca uu qayb ka ahaa noloshooda.

Inkastoo akhlaaqda is-beddelaayo, dhaxaltooyada ka yimaado taariikh kalasooc lagu sameeyo dugsiga wuxuu ku haraa qaar ka mid ah dadka ka socdo beelaha laga tirada badan yahay, sida uu ka muuqdo bayaan-markhaatiga looga sameeyey MRG magaalada Hargaysa :

> *Markii aan dugsi dhigan jirey macallinkeyga ma uusan ogeyn in qof Midgaan ah fasalkiisa dhigtey, wuxuuna bilaabey casharkiisa ku saabsan dhaqanka iyo hiddada qabiilada yar. Wuxuu yiri in Midgaanta ay ka duwan yihiin dadka kale ee jaaliyadda sababtoo ah waxay ka mid yihiin dhaqan ka hooseeya... Ma aysan qabaan xirfad luqad iyo waxay cunaan cuntooyin tayo xun leh ayuu yiri. Aniga waxba ma sheegin laakin dhammaan ardeyda kale ee fasalka way ku nexeen. Waxaan sugey in casharka dhammaado kadibna guriga ayaan u cararey. Hooyadeyda iyo walaasheyda ayaan u sheegay. Macallinka ma oga dhaawaca niyadeed uu hadalkiisa igu yeeshey. Ma uusan u maleynin in ardey ka socdo beelaha laga tirada badan yahay fasalkiisa dhigto.*

Hase-yeeshe, isla qofkaas wuxuu yiri,

> *Kaftan iyo been ku saabsan beelaha laga tirada badan yahay way jiraan, laakin waa inuu qofku iska dhega-tiro. Weligeed uma ogolaado in kalasooc hoos ii dhigo. Waa sii wadey waxaana ku guuleystey waxbarashadeyda.*

Ardayda Gabooye ee dhigta Jaamacadda Hargaysa waxaay hoggaamiyeen inay is- habeeyaan ayagoo garabsiinaayo NGO, si ay u horumariyaan fursadaha waxbarashada beelaha laga tirada badan yahay. Sanadaha la soo dhaafey, waxay sameeyeen guddi (oo jinsigiisu kaladuwan yahay) si ay isku-duwan taageerida maaliyadeed ee waxbarashadooda iyo hormuud u noqdaan qoloyin tiro yar oo kale. Heesiyaanka caanka ah Mariam Mursal, oo u dhalatey qolada tiro yar ee Gabooye waxay xittaa caan ka tahay Soomaalida dalalka kale ee caalamka ku nool, waxay si soke la shaqeysey gabyaha Soomaaliga 'Hadraawi' (xubin ka mid ah qabiilka wayn ee Soomaaliland) si ay dugsi hoose uga dhisaan xaafadda Dami ee Hargaysa.[78]

## Diidmada guurka ka dhexeeyo qabiillada kala duwan

Tiro yar ee guur ka dhexeeyo qabiillada 'biliska ah' iyo qolooyinka xoogsada ayaa ka dhacey magaaloyinka ugu waa-wayn ee Soomaaliland sanadaha la soo dhaafey, laakin dagaal iyo colaad ayeey ka helaan qabiillada kalee ay qaraabo yihiin.

Hargaysa, MRG wuxuu ku wareystey haweeni Isaaq ee 20 jir ah oo ka socda qabiilka Ogaaden oo guursatey nin Gabooye ah. Dhaawacyo tiro badan ayeey jirkeeda ku qabtey taaso sabab u ah dagaalka joogtada ah iyo garaaca ay ku sameeyeen xubinada qoyskeeda. Walaalaheeda ayaa dagaal ku soo qaadey toddobaadka la soo dhaafey. Ayada iyo ninkeedaba aad ayeey u murugsanaayeen iyo wel-welsanaayeen.

> *Waxaan ninkeyga guursadey afar bilood ka hor. Waan ogaa halista aan is geliyey, laakin qadarkuu wuu ka muhimsan yahay waxyaabaha kale. Waxaan ku guursaney tuulo yar oo u dhow Hargaysa iyo waxaan u soo laabaney qoysaskeena anagoo u sheegin guurkeena. Nolosheyda waxay noqotey mid aad u xun markii uu qoyskeygu ogaadey inaan guursadey. Waxaa i garaacey qosykeyga oo Isaaq ah waxayna xireen ninkeyga. Askarta booliska waxay ku dadaaleen inay dhex-dhexaadiyaan iyo waxay qosykeena u sheegeen in diinteena uusan ka soo horjeedin guurka qolo ama qabiilo kala duwan. Laakin suurtogal ayuu noqon waayey in laga dhaa-dhiciyo. Booliska wuxuu go'aansadey inuu ninkeyga xabsiga ku haayo si ay uga badbaadiyaan aarsasho kale. Ugu dambeyntii waa la sii daayey ka dib markii dad ay qaraabo yihiin oo ka tirsan qabiilkiisa Madhibaanka soo caawiyeen... Ma hayo shaqo joogta ah. Haddii uu shaqo helo, wuxuu keena cunto aniganа waan kariya. Haddii uusan keenin, anaago gaajo ah ayaan iska seexannaa. Waxaan ku noolaahay xaalad cabsi iyo murugo joogto ah. Waxaan ka cabsanaaya in xubinada qoyskeyga i dilaan sababtoo ah waxa kale ay igu sameyn karaan horey ayeey igu sameeyeen. Mar-mar waxay dagaal igu soo qaadaan meelo shacbiga joogo, halkaaso dad iga badbaadiyey. Ma ogi goorta uu akhli-xumadaan joogsan doono, Ilaahi kaliya ayaa og.*

Gabadh Maadhibaan oo 17 jir ah ayaa MRG u sheegaty sida xabbad loogu dhuftey markii dad qori sita ay yimaadeen dabbaaldeg ninkaax laga soo horjeedo ee ka dhacey magaalada Hargaysa:

> *Waxaa xabbad laygu dhuftey hal sano ka hor. Anigoo dugsiga ka soo laabanaayo iyo u socdo guriga ayaan*

*joogsadey si aan u eego xaflad ninkaax. Waan ogaa in nin ka socdo qabiilka Musse Deriyo u ninkaaxayo haween ka socoto qabiilka Isaaq. Anigoo ninkaaxa ka daawanaayo ganjeelada guriga dibeddiisa, waxaa yimid niman hubeysan. Waxay ka soo baxeen gaari wayn. Waan cabsadey waana ka carrarey, waxay i dheheen istaag laakin waan iska dhega-tirey. Markaas ayeey xabbad (rasaas) gacanta igu dhufteen. Taasi waxay eheyd goorta ugu dambeeya aan dugsiga tegay. Iminka waxaan ka cabsadaa inaan dibedda tago. Gacanteyda weli way i xanuuntaa iyo sii fiican uma shaqeyo. Waxaa kaliya ee aan xasuusto waa inaan suuxey. Ma aqaano wixii dhacey ee xiga. Waxaan maqley in dad kale ay ayagaba ku dhaawacmeen.*

## Buntland

*Nolosha jaaliyadaheena waa dhibaato, dhibaato ayaan ku qabnaa helidda badbaado iyo sharaf. Xittaa ma lihin ariga aan gooraco iyo hilibka ayaan ku iibiyaa suuqa. Waa inaan lacagtiisa baxshaa ka dib markii aan hilibka iibiyo. Mar-mar ma helo lacag igu filan aan ku baxsho qiimaha ariga waxaana galaa deyn. Haddii aan lacagta dib u bixin waayo dhibaato ayaan gelaaya, way i garaaci karaan ama i xiri karaan. Qofka ku garaacaayo waa isku qabiil qofka jooga saldhigga booliska, halkeeba tegnaa?*
Haween Maadhibaan ah, Boosaaso

Gobolka Buntland waxaa ku yaalo gobolo maamuleed ay badanaa degan yihiin qabiillada Daarood dhinaca galbeed wuxuu xudduud la leeyahay Soomaaliland iyo dhinaca koonfur wuxuu xudduud la leeyahay koonfurta-dhexe ee Soomaaliya. Inkastoo uu aaga badanaa ka fogaadey dagaalka hubeysan iyo siyaasadda ka socda koonfurta-dhexe ee Soomaaliya, International Crisis Group (ICG) waxuu soo sheegay in Buntland uu ammaanka hoos u dhacey iyo ka jiro wel-wel siyaasadeed taasna sabab u ah 'xukumid xun iyo bur-burka isku-xirnaanta qabiilka iyo midnimada qabiilka Daarood ee lug ku lahaa aasaaskiisa 1998'.[79]

Buntland caawin ama badbaadin yar ayuu siiyey beelaha laga tirada badan yahay, ha ahaadano jaaliyadaha waqti dheer gobolka ku noolaa (badanaa qolooyinka xoogsada) ama IDP (Dadka Dalka Gudihiisa ku Barakacay) oo ka socdo koonfurta Soomaaliya (badanaa Bantuda, laakin leh dhowr kooxo xoogsada iyo Banaadiriga).

Baarlamaanka Buntland ma lahan kursi gaar u ah jaaliyadaha tiro yar (badanaa Madhiban iyo Musse Deriyo). Qabiillada wayn (Majerteen, Warsangeli iyo Dhulbahante; oo dhammaan ka socdo qabiilka Daarood), shirka Isimo (odeyaalka qabiilka) oo lagu aasaasey dawladda Buntland jago kuma siinin beelaha laga tirada badan yahay ka dibna kama jawaabin xaaladaha xun,[80] dawladdana ma lahan habka wakiilnimada 4.5 uu TFG isticmaalo kaaso beelaha laga tirada badan yahay jago ka siiyo baarlamaanka. Odeyaalka beelaha laga tirada badan yahay (lagu yaqaano *garaad*, *ugas* ama *bogor*, sida hoggaamiyayaalka qabiillada wayn) si rasmi ah ayaa loo aqoonsan yahay, inkastoo ay awood yar qabaan. Waxaa jiro dhowr ururyada beelaha laga tirada badan yahay; midna ma lahan qalqaalinta ay leeyihiin kuwa joogaa Soomaaliland.

Doorashooyin ayaa lagu qabtey Buntland si loo doorto madaxweynaha iyo baarlamaanka, laakin xisbi siyaasad weli looma ogola gobolka, iyo sidoo kale xuquuqda xorriyada hadalka, isku-imaanshada iyo kullanka si yar ayaa loo ilaaliyaa.

### Xadgudubka xuquuqda dadka gudaha barakac ka ah

*Waxaan u maleynaayey in Boosaaso uu yahay meel ammaan ka jiro, laakin mar labaad ayaa halkaas laygu kufsadey 2007. Waxaan aruurinaayey qashin markaas ayaa hal nin ii yeeray iyo iga codsadey inaan u dhaqo dharkiisa iyo lacag igu siin doono. Waan ogolaadey, markii aan guriga soo galey ayaan gartey inaan dabin soo galey. Labo niman kale ayaa guriga joogey dhammaantoodana way i kufsadeen. Hal ka mid ah waa aabaha inanta aan dhaley ee labo jirka ah.*
Haween Bantu oo 29 jir ah, Boosaaso

Barnaamajka Horumarinta ee Qaramada Midobey (UNDP) ee Soomaaliya waxay sheegeen in Buntland joogaan ku dhowaad 35,000 IDP, kaaso 22,000 ka mid ah ay joogaan magaalo-xeebeedka Boosaaso.[81] Qayb wayn ee ka mid ah IDP waxay ka socdaan kooxaha tiro yar iyo kuwo kalee baylaha ah ee koonfurta Soomaaliya.[82] Nolosha adag ee ka jirta xiroyiinka IDP ayaa si joogto ah ka cambaareeyey Khabiirada Madaxbannaan ee UN'ka , kaaso lagu arkin wanaajin.

Inkastoo dekadda Boosaaso uu ka faa'ideysto shaqada Bantuda iyo Gabooye dhinaca wax-dhisidda, shaqooyinka heerka hoose ee dawladda, sida nadiifinta waddooyinka iyo aruurinta qashinka, iyo waaxda adeegidda, hawshaan waa mid aan nidaamsaneen wuxuuna leeyahay faa'ido bulshadeed oo yar.

Cilmi-baariyayasha MRG waxay arkeen in xadgudubka xuquuqyada haweenada iyo carruurta beelaha laga tirada badan yahay ee IDP oo kuna nool Buntland yahay mid aad u badan. Xadgudubka ugu xun ee xuquuqda insaanka lagu sameeyo beelaha laga tirada badan yahay ee IDP oo lagu soo wargeliyey cilmi-baareyayasha MRG wuxuu ahaa kufsasho iyo caddaalad la'aan, kaaso maxkamadaha iyo booliska badbaadin laga heli karin. Xaaladooda saboolnimada xun iyo sharaf darrada xukumada wax kama qabto.

## Xoog-saarista Xadgudubka ku salaysan Jinsiga (lab iyo dhiddig)

> *Ma jiro hal haween oo halkaan kufsi ka badbaadi karto. Habeenka, waxaa xirada IDP yimaado niman hubeysan waxayna xoog ku kaxeeyaan haweeno iyo gabdho kadibna waxay ku kufsadaan xirada dibaddeeda. Kufsashada waxaa la sameeya labo jeer toddobaadkiiba.*
> Haween beelaha laga tirada badan yahay ee joogto xirada IDP ee Ajuran, Buntland

Xuquuqyada haweenka waxaa Soomaaliya gaar ahaan laga sharci-jebiyaa laga bilaabo 1991 markii ay dawladda bur-burtey. Hase-yeeshe, xitta inkastoo ay haweenada si firfircoon uga qayb qateen dhisidda nabadda, siyaasadda jinsiga ku saleysan ee qabiillada caadi ahaan wuu u diidaa haweenka inay si buuxa uga qayb-qaataan go'aan-gaarka iyo wadahadalka nabadda.[83]

Haweenada ka socdo beelaha laga tirada badan yahay waxaa lagu sameeyaa kalasooc kala duwan. Xuquuqyadooda haween ahaan waa la xadgudbaa, hab-dhismeedka siyaasadeed iyo sidoo kaleba akhlaaqda bulshadeed ee ragga, mar mar xittaa jaaliyaddooda dhexdeeda. Waxay dhibbane ka yihiin wax-qabadyo dhaqameed ee xun sida gudniinta haweenka iyo guurka da'da yar,;kufsiga iyo xadgudubka ku saleysan jinsiga, gaar ahaan midka lagu sameeyo dadka barakacay ee baylaha ah; faa'ido darrada dhaqaalaha iyo awood u-diidka siyaasadeed; xadgudubka guriga oo sababo dhaqan bulshadeed; kalasooca jinsiga ee ka yimaado maxkamadaha Islaamka meesha ay kuwaan ka shaqeeyaan; iyo kalasooca jinsiga ka jira sharciga caadiga ah. Dembiyada loo geeysto haweenka waxaa caadi ahaan loo sameeyaa ayaado wax ciqaab ah lagu rogin dembiilaha.

> *Waa in la aamusaa iyo la soo warbixinin kufsiga sababtoo ah dib ayeey u soo laaban karaan iyo ku kufsan karaan*
> Haween Banaadiri ah, Buntland

Xad-gudubyadaan jinsiga ku saleysan aad ayeey ugu dhacaan haweenada dalka Soomaaliya oo dhan, laakin waxay saamayn ka xun ku lahaan karaan haweenada ka socdo beelaha laga tirada badan yahay, sida lagu caddeeyey markhaati-bixinta uu MRG u soo aruuriyey warbixintaan. Haweenada beelaha laga tirada badan yahay ma lahan badbaadada caddaalada iyo sharciga dawladda, waxna kama qabtaan dalalka ay ka jiraan iyo ka hawlgalaan (sida Soomaaliland iyo Buntland), gaar ahaan haddii dhibbanaha uu yahay mid faa'ido yar leh sida IDP. Meelaha dagaalka ka jiro sida koonfurta-dhexe ee Soomaaliya, difaac kama helaan sharciga caadiga, inkastoo carruurta, haweenka iyo dadka duqa ah, wafdiyada nabadda iyo dadka naafada ah, caadi ahaan, loo baahan yahay in sharciga dhaqaneed ee Soomaaliya ka badbaadiyo xadgudubka qolooyinka dagaalka wada.[84]

> *Caddaalad ma jiro; haweenada ma qabaan xuquuqyada ay xaq u leeyihiin sababtoo ah qofna ma rabo inuu na caawiyo, anagana keligeena ma hadli karno sababtoo ah waxaan ka cabsaneynaa in si ka xun naloola dhaqmo*
> Haween Bantu ah, koonfurta-dhexe ee Soomaaliya

Cilmi-baariyayasha MRG oo u booqdey xiro IDP ku yaalo Boosaaso 2009 waxaa lagu yiri inuu jiro kufsi aad u xun iyo joogto ah oo lagu sameeyo haweenada ka socdo beelaha laga tirada badan yahay iyo ku sameeyaan nimanka qabiillada wayn iyo mar-mar booliska, militariga ama adeegga badbaadada ee Buntland. Hal haween waxay timid Buntland ayadoo lagu soo kufsadey koonfurta Soomaaliya iyo u socoto meel 'ammaan ah'. Markhaati-bixintaan (ayadoo magaca dhibbanaha la sheegin sababo ammaan awgeed) waxaa laga soo aruuriyey haweenada IDP ee ka socdo Banaadiri, Bantuda, Madhibaan, Midgaan iyo Ajuran.

> *Waxaan ku noolaa Boosaaso laga bilaabo 2001. Waxaan qashin ka aruuriyaa waddada iyo guryaha iyo lacag ayaa la ii siiya. Sanadka 2000 markii aan ku noolaa Baydhaba* [koonfuurta-dhexe ee Soomaaliya]*, Waxaan ku socdey wadadda marki afar nimood oo hubeysan halkaas igu af-duubeen. Xoog ayeey gaarigooda ii geliyeen, meel cidlo ah ayeey i geeyeen kadibna way i kufsadeen. Qofna ima badbaadinin keligeyga ayaan guriga u soo laabtey…Baydhaba ayaan ka tegay aniga iyo dad aan qaraabo nahay iyo waxaan go'aansaney in meel ka ammaansan ka raadino waqooyiga dalka. Mar labaad ayaa la i kufsadey markii aan dhax maraayey meel u dhexeysa Beledweeyne iyo Gaalkacyo. Niman hubeysan ayaa naga soo dejiyey baska iyo ina kufsadey waxaan eheen aniga iyo seddax haweeno kale ee dhallinyaro ah oo ay ku jirto inan yar ee walaasheyda*
> Inan Bantu oo 29 jir ah, Boosaaso

> *Waxaan dhab ahaan ka socdaa koonfurta Soomaaliya, Shabeellada Hoose. Qosykeyga waxuu ahaan jirey beeraley, nolol ayaan heesan jirney laakin iminka waxaan nahay qaxooti. Waxaan Boosaaso imid bilowgii 1990nadii. Waxaan ku noolahay Xirada Ajuran. Haddii aan eegin saboolnimada, dhibaatadeena koowaad waa nabad la'aanta,*

*haweenada si joogto ah ayaa loo kufsadaa. Anigaba waxaa la i kufsadey labo mar, 2002 iyo 2005. Labada jeer waxaa la i kufsadey markii aan xirada ka fogaadey si aan musqul u isticmaalo. Waqtiyadaas waa markii ay dembiileyaashu caadi ahaan haweenada kufsadaan, sababtoo ah aad ayeey baylah u yihiin*
Haweeni 42 jir ah oo ah Bantuda, Boosaaso

Haweeni *Banaadiri* ah oo carmalo ah oo xero IDP ku yaalo Boosaaso kula nool gabdhaha ay dhashey ayaa waxay cilmi-baaraha MRG u sheegtey sidii ay toddobo bilood ka hor, labo niman ay soo galeen aqalkeeda, garaaceen iyo horteeda ku kufsadeen hal ka mid ah inanteeda. Booliska ayeey ka dacwootey laakin wax caawinaad ah kama helin, iyo dib ayaa loo kufsadey.

*Asaga* [qofka i kufsadey] *waa la xirey laakin maalinta xigta ayaa la sii daayey; waxaa suurtogal ah inuu lacag musuq-maasuq ah siiyey askarta booliska. Hal bil ka dib, isla ninkii wuxuu la soo laabtey seddax rag oo hubeysan wuuna i kufsadey. Nimanka kale dibedda aqalka ayeey istaageen, qofna nama difaacin. Ninku wuxuu markaa i yiri inuu marar badan igu soo laaban doono sidii uu 'ku raaxeysto jirarka cad-cad ee gabdhaha aan dhaley'. Wuxuu i kufsadey si uu iga aaro dacwada aan booliska ku sameeyey. Booliska uma sheegin goortaan. Waxaan u baahanahay in layga daaweyo dhaawaca uu i geystey. Inanteyda uur ayeey qabtaa iminka, waxaa uureeyey isla ninkii hooyadeeda kufsadey. Aad ayaan u dhibaateysan nahay. Qof ha naga wado dhulkaan!*

Haweenada waxay xittaa ka hadleen kufsashada ay sameeyaan dadka xukumada u shaqeeyo:

*2004, waxaan la socdey 12 haweeno, waxaan waabariga u soconey shaqo. Gaari yar ayaa yimid iyo na ag istaagey. Qaar ka mid ah haweenada way baxsadeen laakin aniga iyo inan yar oo 13 jir ah oo halkaas u timid si ay u aragto wixii dhacey ayaa la qabtey. Labadeenuba waxaa nala geeyey xeebta Boosaaso halkaaso labo niman aniga i kufsadey, ninkii seddaxaadna wuxu kufsadey inanta yar. Anigoo dhiig-baxaaya ayaan booliska tegay si aan u soo dacwoodo. Waan yaabey markii aan saldhigga booliska ku arkey hal ka mid ah dadka i kufsadey ayagoo madaxa geshtay qayb ka mid ah dharkeyga. Wuu sarkhaansanaa. Markii aan booliska u sheegay, waxay igu dheheen inuu ninku ahaa sarkaalka mas'uul ka ah saldhigga booliska iyo inaysan xiri karin. Boolisku wax tallaabo ah ma qaadin si ay u baraan, qofna lama xirin.*
Haween Madhibaan ah, Boosaaso

*Markii koowaad ee la i kufsadey wuxuu ahaa 2002, afar niman ayaa i kufsadey, waxaan isku dayey inaan baxsado laakin way i garaacen. Dhowr ilko ayaa iga jebay garaacaas awgeeda. Waxaan dareemey sharaf-darro iyo ceeb, booliskana kama dacwoonin. Mar kale 2004, lix niman oo labiska ciidanka sita ayaa i kufsadey. Waxaan la joogey haweeno kale laakin way baxsadeen. Dhibaato ayaa jirka iga gaareey kufsashadaas aad u xun awgeeda laakin ma aanan qabin lacag igu filan si aan takhtarka u tago. Waxaan daawo ka qaatey farmashiiyaha. Booliska uma sheegin sababto ah aad ayaan u cabsanaayey. Uur ayaan qaadey. Waxaan iminka korsadaa inanteyda afar jirka ah; aabaheeda waa hal ka mid ah lixdaas nimood ee i kufsadey. Waan jecelahay inanteyda. Marmar xasuus-xumada ayaa igu soo laabato si tartiib ahna ayaan u ooya*
Haween Bantu oo 42 jir ah, Boosaaso

*Caadi ahaan waabariga ayaan suuqa tegaa. Shan sano ka hor waxaan la socdey inanteyda 14 jirka. Suuqa ayaan u soconey, annagoo wadada mareyna ayaa gaari na ag yimid. Lix nimood oo ku labisan dharka ciidanka ayaa si xoog ah inanteyda gaarigooda u saarey anigana way i garaaceen markii aan isku dayey inaan joojiyo…Isla meesha lagu afduubey ayaan ka helnay maalinta xigta. Waxay u ekeed meyd. Booliska ayaan u sheegay waxayna i dheheen inaan nasiib leeyahay haddiba aan helay inanteyda oo weli nool. Ninkayga saldhigga booliska ayaa lagu garaacey kadib markuu booliska caayey iyo khalad ahaan ku eedeyey dhibaatada. Dhiig-kar ayaa ku dhacey dhaawaca jirka iyo maskaxda gaarey awgeeda, wuxuuna dhintey hal sano ka dib. Lix nimood ayaa si xun iyo noq-noqod leh u kufsadey ilaa ay ka suuxdey. Ma aan heysan lacag aan isbitaalka ku geeyo...Waxaan xittaa isku dayey inaan la xiriiro wariye si aan xaaladda u sheego laakin ma aanan heysan wax cadeynaayo dembiga dhibaatoyinkaasna way iga adkaadeen. Shan sano kadib weli dhibaato ayeey ku qabtaa kaadida. Sanadka horey ayeey guursatey laakin carruur ma aysan dhalin. Inanteyda dhaawac xun ayeey qabtaa waxayna u baahan tahay in daaweyn lagu sameeyo. Haddii aan u dhalan lahaa qabiil kale waxaa nala siin lahaa magdhow laakin waxaan nahay 'Midgaan sabool ah, oo looma ooye ah'.*
Haweeni Madhibaan ee 50 jir ah, Boosaaso

## Caddaalad la'aan

*Beelaha laga tirada badan yahay oo aysan qabin ilaalinta qabiilada wayn waxaa suurtogal ah inay dhibbane ka noqdaan qaladdaadka ka dhexeeyo sharciga dhaqaneed, midka dembiga iyo midka shaariicada.*
Takhtar Shamsul Bari, Khabiirka Madaxbannaan ee UN, oo ka hadleya Buntland warbixinta 2010 laga sameeyey xuquuqda ben-aadinka Soomaaliya.[85]

Cilmi-baariska MRG wuxuu muujinaaya in beelaha laga tirada badan yahay ee Buntland qabaan fursad yar oo ay ku helaan cadaalad haddii ay cabasho ka sameeyaan dembi laga galay ama lagu eedeeyo dembi iyo la xiro. Booliska, oo badanaa ka mid ah qabiilada wayn, badanaa way didaan inay baaraan cabashooyinka qoloyiinka tiro yar, waxay taageeraan qabiilka ugu wayn markii ay ka hortagaan qof ka socdo qolo tiro yar (gaar ahaan haddii cabashada uu ku toosan yahay sarkaal boolis), weligiina lama baaro eedeynta kufsashada. Maxkamadaha ma hubiyaan xuquuqda qofka la eedeeyey, ay ku jirto xaqa difaaca sharciyeed, rafcaan qaadashada iyo codsiga cafiska markii la soo rogo xukunka toogashada, sida loo markhaati sheegay MRG. Iloyiin kale waxay xittaa arkeen xaalada awood-darrada habka sharciga iyo caddaalada ka jiro Buntland, iyo sidoo kale in aysan dawladda ku jirin wakiilada beelaha laga tirada badan yahay.[86]

Beelaha laga tirada badan yahay ma helaan caddaalad markii sharciga caadiga ku dabakhmo dembiyada, ay ku jiraan dilka, halkaaso xukunka toogashada lagu beddeli karo bixinta *diya*, ama magdhowga la siiyo qoyska, markii uu qabiilka dhibanaha ogolaado; dhimashada shil ahaan ku dhaco; ama dagaal ku so qaad aad u xun. Sida loogu tilmaamey MRG, odeyaasha beelaha laga tirada badan yahay waxay ku khasban yihiin inay heshiis la galaan odeyaasha qabiilada waa-wayn, iyo go'aanka u geeyaan maxkamadda, oo markaas kiiska xireyso ayadoo baaritaan boolis oo dheeraad ah la sameynin ama tallaabo maxkamadeed la qaadin. Qoloyiinka tiro yar lacag yar ayaa la siiyaa, sida la sheegayna dhibaato ayeey ku qabaan helidda magdhowgaas la ballanqaadey.

Hal nin Midgaan ah oo ku nool magaalo-madaxa Buntland ee Garowe, wuxuu cilmi-baareyaasha MRG u sheegay in walaashiisa uurka leh uu ninkeeda qabiil wayn ka socdo xabad ku diley, bisha Luulyo 2007. Arrinta odeyaasha beelaha laga tirada badan yahay iyo qabiillada wayn ayaa ku heshisyey maxkamadda dibeddiisa.

*Ka dib markii aan xaalada ka hadalney, waxaa naluga khasbey inaan ogolaano magdhow. Waxaa nalugu yiri, 'Inkastoo aad Midgaan tihiin, ogolaada 40 geel* [oo ah 10 geel ka yar magdhowga *diya* ee caadi ahaan la baxsho] *ama iska tega' anagana waan ogolaaney sababtoo ah wax kale waan qaban weyney.*

## Koonfurta-dhexe ee Soomaaliya

*Xaaladda kooxaha tiro yar ee koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya waa mid wareer iyo awood-darro ah. Waxaa loola dhaqma sida inay xoolo yihiin waxaana si joogto ah si xun ula dhaqmo qabiilada waa-wayn. Dadka ka socda beelaha laga tirada badan yahay waxay dareemaan cabsi haddii ay si sharaf ah ka hadlaan awoowayaashooda iyo hiddahooda. Dadka ka socdo qolo tiro yar ee xirfad leh ma qabo xirfado shaqo sida dadka kale. Dhibaatadaan waa mid aad uga xun koonfurta iyo gobolada dhexe markii loo bar-bardhigo Mudug* [waqooyiga-dhexe] *iyo gobolada waqooyi*
Odey Maadhibaan ah

Ayadoo sabab u ah dhibaato ammaan aad u xun, MRG dhibaato wayn ayuu kala kulmay inuu beelaha laga tirada badan yahay ka warbixiyo goboladaan, halkaaso ay ku yaalaan beeraha iyo aagaha ay geedaha ka ag baxaan webiga iyo taariikh ahaan Bantuda ku noolaan jireen; magaaloyinka dhinaca xeebta ku yaalo oo ay Banaadiri degaan, tiro ahaan jaaliyadda ugu wayn; jasiiradaha koonfur galbeedka oo ay kallumeysiyada Bajuni ku nool yihiin; iyo Muqdisho iyo aago kale oo ay degan yihiin kooxo Bantu ah iyo xoogsato.

Qayb wayn ka mid ah koonfurta-dhexe ee Soomaaliya, laga bilaabo xuduudka Kenya ilaa gobolada dhexe ilaa Buntland, waxaa gacanta ku haayo ururka Islaaminta Al-Shabaab, kaaso aago yar iyo qaybo ka mid ah Muqdisho oo uu heysto TFG iyo ciidamada (AMISOM) Soomaaliya.[87]

Warbixintiisa bisha Maarso 2010, Shamsul Bari, Khabiirka Madaxbannaan ee UN wuxuu xaaladda xuquuqda insaanka ee Soomaaliya diiradda ka saarey dhibaatada ay carruurta iyo haweenada IDP iyo beelaha laga tirada badan yahay ku qabaan 'ciidamada Islaamiga' iyo xaalad ammaan oo si xumaaneysa:

*Suurtogal ma noqon doono in nabadda iyo ammaan lagu soo celiyo Soomaaliya ayadoo si awood la'aan ah loo eegayo xaaladda insaanka iyo xuquuqda insaanka oo si halaabaayo. Siyaasad lagu joojinaayo dagaalada Muqdisho waqti dheer ma socon doono. Awoodda Dawladda inay difaacaan shacbigiisa – ay ku jiraan haween iyo carruur, IDP iyo beelaha laga tirada badan yahay – dagaalka aan joogsi leheen iyo xoojinta Shariicada ee ciidamada Islaamiga (kaaso keeno, in dadka si sharaf darro iyo insaan la'aan ah lagula dhaqmo) waa in la caawiyaa sidii si deg-deg ah u horumarto.*[88]

Laga bilaabo goorta uu al-Shabaab gobolodaan u qabsadey tan iyo 2006 waxaa dhib noqdey in wariyayaasha iyo ururyada caalamka ee samafalka soo galaan. Ururyada xuquuqda insaanka Soomaaliya ku yaalo waxaa lagu qasbey inay amuusaan ama halkaas ka cararaan. 2010, xaalad sii xumaaneyso awgeeda UNHCR wuxuu dalalka kale ka codsadey inay dugsiin siiyaan dadka ka soo barakacay Soomaaliya xittaa haddii aysan u qalmin qaxootinimo.[89]

Aagaan wayn, beelaha laga tirada badan yahay iyo sidoo kale dhammaan shacbiga ka socdo qabiillada wayn, waxay dhibbaane ka noqdeen xadgudubka xuquuqda insaanka iyo sharciga xuquuqda insaanka caalamka.[90]

Markhaati gaar ah oo sheegaayo xaaladaha xadgudka xuquuqda insaanka joogtada ah ee beelaha laga tirada badan yahay waa dhib in laga helo aagahaan. Hase-yeeshe, kalasooca iyo aflagaadada Bantuda oo ay ku sameeyaan xubinada qabiillada wayn wuxuu ku dhacaa maadaama ay qolo tiro yar yihiin, iyo sidoo kale wax loo geysto jirkooda iyo sidoo kaleba dhibaatada ku dhaco dad badan xittaa markii Bantuda qayb wayn ka yihiin TFG iyo Baarlamaanka Federaaliga ku Meelgaarka (TFP), sida Af-hayeen ku Xigeenka horey ee TFP.

> *Nolosha dhibaato ayeey qof walba u tahay Muqdisho, nolosheena si joogto ah ayuu dhib ku jiraa. Laakin waxaa xittaa dheeraad noo ah kalasooca iyo sharaf-jebinta maalin walba naluga sameeyo. Aniga waan u bartey, laakin waxaan dareema xanaaq iyo murugo markii aan ka fikiro in xittaa ilmaheyga ay dhibbane ka yihiin kalasoocaan. Waxaan u baraney inaan qabanno hawlaha culus ay dadka kale nacban yihiin inay sameeyaan. Haddii aad Jareer tahay, waa inaad si adag u shaqeysa sababtoo ah qofna kuguma caawin doono bulshadaan. Haddii aan gaari kale shil la galo, mar walba aniga ayaa gardarrada la i saari doonaa waana la i caaya. Xaaskeyga waa qof guri ka shaqeyso. Hal mar waa la xirey iyo waxaa lagu garaacey xabsiga. Waxaa lagu eedeeyey inay xadey silsilad dahab ah laakin wax caddeyn ah lama qabin. Waa la sii daayey, silsilada dahabkana meel kale ayaa laga helay. Tani waa nolosheena; dalkeena ayaa naluga kalasooca*
> Darawaal bas oo Bantu ah iyo 40 jir ah, Muqdhiso

Wel-welka ugu wayn uu MRG ka qabo caddeymaha ku saabsan jebinta xuquuqa insaanka lagu haayo beelaha laga tirada badan yahay ee koonfurta-dhexe ee Soomaaliya, oo dheeraad u ah midka saamayn ku leh shacbiga oo dhan iyo qabiillada waa-wayn si siman ama kala duwan waa dilka sabab la'aanta ah; kufsiga; caddaalad la'aanta; barakaca xooga ah iyo xattooyada dhulka intii lagu jirey dagaalka 1990kii; iyo ciqaab la'aanta xattooyada dhulka waqtiga dawladda Siad Barre; waxbarasho la'aan; iyo si xun ula dhaqmida IDP iyo burcadka cuntada u socoto xiroyinka IDP.

Haweenada u dhashey beelaha laga tirada badan yahay waxay MRG u sheegeen dhibaatoyinka bulshada iyo dhaqaale ay la kulmaan, ay ku jirto shaqo iyo waxbarasho la'aanta, iyo inay wakiilnimo siyaasadeed loo ogoleen, iyo daryeel caafimaad iyo akhlaaqda kalasooca ee xubinada qabiillada wayn.

> *Dhibaatada ugu wayn ee haweenada u dhashey beelaha laga tirada badan yahay waxaa weeye inaysan wax sharaf ah ka leheen bulshada. Waxaa kaa dheeraad u ah in badanaa haweenadaan ay yihiin shaqaale guri oo loo yaqaano* booyeeso *iyo marmar waxay dhibaato ku qabaan qoysaska ay u shaqeeyaan, sida in xattooyo ku eedeyaan haweenada guriga leh iyo si ula kac ah loo ruqseeyo. Qaar ka mid ah haweenadaan waddooyinka ayeey iska socdaan, halkaasna ayeey ka ciyaaraan si ay lacag u helaan.*
> Odey Maadhiban ah, koonfurta-dhexe ee Soomaaliya

> *Haweenada u dhashey beelaha laga tirada badan yahay door wayn kama lahan xaaladda bulshadeed, dhaqaale iyo siyaasadeed ee jaaliyadda. Badanaa waa kuwo aan waxba qori karin ama akhrin karin mana laha awood ay ku wanaajiyaan tayada nolol-malmeedkooda; badanaa guryaha ay leeyihiin dadka ka soo jeeda qabiillada wayn ayeey ka shaqeeyaan iyo shaqooyin kale guri. Inkastoo u jiro xaalad saboolnimo aad u xun iyo kalasooc ka jiro haweenada u dhashey beelaha laga tirada badan yahay, ma heli karaan xannaano caafimaad aad u fiican markii loo bar-bardhigo haweenada u dhashey qabiillada wayn oo xoog ku qaato dhammaan kaalmada dalka loo soo diro iyo daawada.*
> Haween Bantu ah, koonfurta-dhexe ee Soomaaliya

Waxay xittaa ka hadashey xaaladdeeda, awoodda qabiillada wayn iyo caddaalad la'aanta ay qabaan beelaha laga tirada badan yahay markii dembi laga galo:

> *Waxaan rabey inaan gurigeyga ka kireysto dad Banaadiri ah, si aan lacag dheeraad ah u helo. Nin ka socdo qabiil wayn ayaa ii yimid, wuxuuna igu yiri,* 'Gurigaan kama kireyn kartid dad kale, aniga kaliya ayaad iga kireyn kartaa…' *Markuu ninkuu ogaadey inaan gurigeyga ka kireeyey qoys Banaadiri ah, wuxuu bilaabey inuu dhibaato sameeyo dhismaha ayuu ka ceeriyey. Ilaa maanta gurigeyga waxaa degan ninkaan iyo ma ogi wixii dhici doonaa.*

Sida meel walba ee Soomaaliya, akhlaaqda ay xubinada qabiillada wayn ku sameeyaan guurka kala-qabiilka wuxuu

raad aad u xun ku yeeshaa haweenada u dhashey beelaha laga tirada badan yahay.

> *Waxaan guursadey nin Majerteen ah* [qabiil Daarood ah]. *Marki aan dhaley inanteyda, ninkeyga hooyadiisu waxay ka codsatey inuu i furo. Markii hore wuu diidsanaa, laakin waxay ku hanjabeen inay dayriyaan, sidaas awgeeda wuxuu ku go'aansadey inuu i furo intii u lumin lahaa qoyskiisa. Furitaanka ka dib, waxaan u gurey Muqdisho oo waxaan ka tegay Boosaaso, waxaan ku noolahay si rajo la'aan ah anigoo iga lumey qoyskeyga iyo ninkayga aan jeclaa.*
> Haween Midgaan ah ee ku nool xiro IDP ee ku yaalo Muqdisho.

Warbixinta 2008 uu qorey hay'adda warbixinta IRIN ee UN'ka waxay sheegen dhibaatada wayn ay qabaan ugaarsadaha Eyle. Warbixinta sida uu sheegay isku-duwaha goboleed ee xaaladaha samafalka UN'ka ee Gobolka Shabeellada Dhexe wuxuu dadkaas ku magacaabey 'dadka Soomaaliya laga hilmaamey', wuxuuna sheegay in xaaladdooda uu ka daran yahay midka dadka kale ku nool dalka markii la eego gaajada ay ku nool yihiin abaarta awgeed.[91]

Waxaa taas dheeraad u ah, UNHCR wuxuu ka hadley wadahadalka ay la yeesheen Eyle ku nool Baydhaba, waqooyi-galbeed ee Muqdisho, bilowga 2009 oo u sheegey in haweenada jaaliyaddooda loo ogoleen inay biyo ka soo dhaamiyaan isla ceylka qabiilka wayn ee Rahanweynka isticmaalaan. Waxaa dheeraad u ah, 'xittaa inkastoo ay aad sabool u yihiin', Eylaha waxay UNHCR ka codsadeen inaysan u keenin caawinaad samafal sababtoo ah 'waxay ka cabasanaayaan inay billiliqeystaan xubinada qabiilka wayn.'[92]

## Dagaalka Al-Shabaab

Al-Shabaab wuxuu ka soo horjeeda in ciidamo shisheeye joogaan Soomaaliya, ciidamada Itoobiya ama AMISOM;[93] wuxuu rabaa inuu sameeyo *jihad* caalam ah si dalalka galbeed u soo fara-gelin Soomaaliya, waxaa loo maleeya inuu taageero al-Qaeda; iyo wuxuu rabaa inuu af-gembiyo TFG iyo Soomaaliya ku maamulo fasirkooda kacaansan ee sharciga Islaamka.

Habka uu kooxdu ku fasiro Shariicada wuxuu ka soo horjeeda heerka caalamka ee caddaalada iyo maxkamad xaq ah (tusaale ahaan waxay diidaan in qofka la eedeyey wakiil laga noqdo markii maxkamad la saaro iyo rafcaan laga codsado maxkamad sare). Markii la eego xaalad dhacey 2008, inan yar oo 13 jir ah oo ku nooleed magaalada Kismaayo ayaa dhagax lagu diley ka dib markii ay ciidamo xiriir la leh Al-Shabaab soo xireen. Inanta waa la kufsadey, laakin waxay ku eedeyeen sino.[94]

Al-Shabaab wuxuu shacbiga ku isticmaala ciqaabada *hudud* sida goynta addimada jirka, dil lagu sameeyo dhagax, iyo karbaashka haddii dadka lagu eedeeyo xattooyo, sino, jaajusnimo, khaa'inul-waddanimo iyo dembi laga galo diinta Islaamka; wuxuu ku khasbaa sharciyada anshaxa ayagoo hab labis gaar ah ku khasbaayo haweenka iyo timo-jar gaar ah ragga; iyo waxay mamnuuc ka dhigeen sigaarka iyo daroogada (oo ku jiro *khaatka*), dhegeysiga ama sameynta heeso ama ciyaaro aan diini ahayn, daawashada filimka, telefishinka iyo isboortiga.

Wuxuu xittaa ka soo horjeeda citiqaadyo diimeed oo kale iyo in diimo kale la lahaado, sida diinta Kiristaanka; diin kale in la raaco; raacidda dhaqanada aan Islaam eheen laakin Afrikaanka ah; iyo dhaqanka 'fasuuqa ah' ee Soomaalida suufiga ah sida sharfida awoowayaasha, safarka meelaha barakeysan, duugida qabuur dhisan, iyo daaweynta diimeed (quraan ku akhrin).

Al-Shabaab wuxuu indhaha saarey qoloyiin tiro yar, ayagoo ku eedeynaayo wax-qabadkooda caqiidadeed; sida Banaadiriga (gaar ahaan Barawaaniga), Bantuda iyo Kiristaanka (oo badanaa ah Bantuda diintooda beddeley).

Kiristaanka Soomaalida ah waxay ku jiraan halis in al-Shabaab ula dhaqmo sida *gaalo* ama 'dad diinta Muslimka diin kale ku beddeley' iyo lagu xukumo dil sida uu mowqifka Shariicada sheegaayo. Sida uu sheegaayo war-baahinta Soomaliyeed ee Bartamaha, al-Shabaab iyo xubinada kooxaha kale ee Islaamiga ah 'waxay dalka ku dileen in ka badan labo iyo toban Kiristaan' inta u dhexeyso Maarso 2009 iyo bilowga 2010. Warbixinada waxaa ku jiro toogashada 69-jirka Omar Khalafe koontoroolka waddada magaalada Marka 15 Seteembar 2009, sababtoo ah wuxuu sidey kutaabka Kiristaanka;[95] labo wiilo ayaa madaxa laga gooyey Kismayo agteeda Febraayo 2009 sababtoo ah aabahooda oo Kiristaan ah ayaa diidey inuu sheego warar ku saabsan hoggaamiye kaniisad;[96] dilka Muqdisho agteeda 1 Janaayo 2010 ee hoggaamiye kaniisad qarsoon, xaaskiisa dalka ayeey ka carrartey ka dib markii lagu hanjabey in la dili doono;[97] iyo dilka qof Kiristaan ka noqdey magaalada Afgooye 23 Maarso 2010.[98]

Sida uu sheegaayo Mashruuca Bantuda Qaranka Soomaaliya (NSBP) ee dalka Mareykanka, dhowr Bantu ayaa lagu diley Jubbada Hoose Janaayo 2010 sababtoo ah waxay tegeen xaflad dhaqaneed. Qabuurada Bantuda waa la bur-buriyey iyo Shiikhyada Bantuda waxaa lagu qasbey inay raacaan caqiidada al-Shabaab.[99]

NSBP wuxuu soo wargeliyey dagaalo dhaqameed oo badan ay al-Shabaab ku sameeyen Bantuda, markii ay qabanaayaan munaasabadaha dhaqankooda, sida koob-ka-ciyaarka – oo qayb wayn ka ah dhaqanka Bantuda – iyo isticmaalka daawoyinkooda dhaqanka (isla markiina al-Shabaab wuxuu ka joojiyaa inay helaan caawinaad

caafimaad) kaaso mar-mar sababo garaacid iyo dhimasho. Al-Shabaab wuxuu mamnuucey isticmaalka luqadaha ama lahjadaha beelaha laga tirada badan yahay; wuxuu Bantuda ku qasbey inay yeeshaan magac Carabi ah; ku khasbey haweenka inay gashtaan *xijaabka*, iyo wuxuu xadeeyey shaqada ay qaban karaan; iyo waxay billiliqeysteen iyo bur-buriyeen hantida Bantuda ay ku jiraan geedaha cambaha.[100]

Warbixino badan ayaa sheegayo inuu Al-Shabaab carruurta qafaalo ay ku jiraan kuwa Bantuda, qaar da'dooda waa 10 jir.[101] Sidaas awgeeda, dhallin-yaro badan waxay ka baxsadeen tuuloyinka waxayna tegeen Kenya iyo Tanzania.

Maarso–Abriil 2009, qabuurada taariikhiiga ah ee Barawaaniga xushmayn jirey ayaa al-Shabaab ka bur-buriyey magaalada Baraawe; masaajidyada waa la xirey; iimaamyada waa loo diidey inay hoggaamiyaan dukashada; shaqada samafalka waa la joojiyey; shiikhyadana dhowr maalmood ayaa la xirey.[102]

# Qaxootida beelaha laga tirada badan yahay iyo Soomaalida dalalka caalamka ku nool

Xaaladda qaxootida beelaha laga tirada badan yahay ee ku dhax jiro qaxootida Soomaaliyeed ee dalalka caalamka ku nool waa in la eegaa, sababtoo ah dhibaatoyinka ay qabaan qaxootida beelaha laga tirada badan yahay badanaa si fiican looma eego. Isla markiiba, xubinada caan ka ah Soomaalida oo ku nool dalalka caalamka waxay ku caawin karaan in la aqoonsado dhibaatada xun ay beelaha laga tirada badan yahay ku qabaan Soomaaliya.

Tirada Soomaalida ku nool dalalka caalamka waa qiyaas ahan afar meelood meel ee dhammaan dadweynaha iminka ku nool Soomaaliya iyo Soomaaliland oo la isku darey. Soomaali badan ayaa degan dalalka Bariga Dhexe (gaar ahaan Yemen), iyo dadweyne Soomaali ayaa wakhti dheer degan Kenya, Itoobiya iyo Jabuuti. Badanaa qaxootida Soomaalida iyo xubinada shacbiga Soomaaliyeed ee dalalka caalamka ku nool waxay u dhasheen qolooyinka tiro wayn, laakin jaaliyado u dhashey beelaha laga tirada badan yahay ayaa ku dhax nool kooxyadaan oo dhibbane kalasooc ku noqon karo dalka marti-geliyaha ah.

Tirada qaxootida si dhakhsi ah ayuu u kordhey markii ay dawladda dhacdey 1991. Badanaa waxay u qaxeen Kenya ama Itoobiya oo ay iminka degan yihiin 319,149 iyo 68,686 qaxooti Soomaali ah midkiiba.[103] Kuwo badan waxay dalalka galbeed u degeen si ay xal waara uga helaan dagaalka sii socdo iyo dawlad la'aan.

Xuquuqyada sharciga qaxootida Soomaaliyeed badanaa waa laga ilaaliyaa dalalka marti-geliyaha ah, laakin dhowr dalal galbeed waxay isku eegeen inay yareyaan iyo xadeeyan tirada qaxootida Soomaaliyeed. Markuu dagaalka sii kordhey sanadaha ugu dambeeyey, kumaan-kun qaxooti kale ayaa gurigooda ka qaxey iyo noqdey barakac.

Qaxootida Soomaalida ku nool dalalka caalamka waxay badanaa qabaan farqiyada ka dhexeeyo beelaha laga tirada badan yahay iyo qabiillada wayn oo la mid ah midka ka jiro dalkooda hooyo, qaxootida u dhashey qabiillada wayn waxay helaan taageerid iyo caawinaadda ugu badan. Inkastoo dhammaan kooxyada qaxootida Soomaalida ay yihiin kuwo faa'ido darran iyo fursad darran, maadaama ay yihiin qolooyin tiro yar oo mar-mar dhibbane ka ah naceeb, qolooyinka tiro wayn waxay badanaa helaan faa'idoyinka bilowga ah sida waxbarashada, xirfad shaqo, u barashada nolosha dalalka galbeed, xiriir qoys ee qaxooti dalka horey u soo degay, iyo taageerid qabiil.

Qaxootida iyo magangalyo-doonka u dhashey beelaha laga tirada badan yahay waxay labaatanka sano la soo dhaafey ahaayeen kuwo 'aan la arki karin' saboolnimadooda, waxbarasho la'aantooda iyo bulsho ahaan awood-yaridooda awgeed. Waxay taageerid yar ka heleen qaxootida u dhashey qolooyinka tiro wayn iyo tiro ahaan way yar yihiin urur ahaanna tabar-darran yihiin. Qaxootida Kenya waxaa ku jirey kumaan-kun Bantu iyo Banaadiri iyo tiro yar ee qolooyinka xogsada. Xubinada qabiillada wayn ayaa halis ku haaya xiroyiinka qaxootida, taaso ay ku qasabtey UNHCR Kenya inay Bantuda ka saaraan hal xiro iyo dejiyaan xiro kale.[104]

Ururyada daryeelo qaxootida dalka marti-geliyaha ah xoogaa ayaa og xaaladda beelaha laga tirada badan yahay. Shaqaale bulsho ee London, oo ka shaqeeyo wararka ku saabsan kalasooca jinsiyadeed iyo fursad la'aanta qaxootida Soomaalida ah, wuu ka yaabey in 'Soomaalida ay qabaan qoloyiinkooda tiro yar sida kuwa hindida lagu magacaabo Dalit'.[105]

Qarinta xaaladdaan 'qolo tiro yar ee ku dhax jiro qolo tiro-yar' oo ka dhax muuqda qaxootida jaaliyadaha Soomaaliyeed oo ayagaba jinsi tiro yar ka ah dalkooda marti-geliyey, wuxuu hor-istaagaa wanaajin xaalad-qarameed halkaaso xaq u lahaanshada xuquuqyo insaan sida ay u codsadaan qaxootida qolooyinka tiro wayn aysan si xaq iyo sinnaan ah u helin qaxootida beelaha laga tirada badan yahay. Wax-qabadyo ka badan ee lagu dhirri-gelinaayo xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay ee dhax degan Soomaalida dalalka caalamka ku nool wuxuu saamayn ku lahaan karaa qaxootida beelaha laga tirada badan yahay iyo sido kale saamayn ayuu ku lahaan karaa Soomaaliya, halkaaso xubinada Soomaaliyeed ee iminka leh muwaadanimo ajnabi ka qayb qaataan wada-hadalka nabadda iyo waaxyada dawladda.

UNHCR wuxuu aqoonsadey halista gaarka ah ay qabaan magangalyo-doonka Soomaalida ah oo u dhashey beelaha laga tirada badan yahay wuxuuna soo saaray shurudo u qalmid gaar ah.[106] Dalalka badankooda waxay ogolaadeen xaaladdaan. Tusaale ahaan, 2004, UNHCR wuxuu garabsiiyey barnaamij dib-u-dejin gaar ah ee dalka US in ka badan 15,000 qaxooti Bantu ah oo ku noolaa Kenya.[107] Kani wuxuu ku xigey barnaamaj ka yar oo dawladda Mareykanka ku sameeyey qaxootida Banaadiriga ah.[108] Dalalka Midowga Yurub, oo ku jiro dalka Ingiriiska,

waxay xittaa aqoonsadeen beelaha laga tirada badan yahay inay yihiin qolooyin u baahan tixgelin gaar ah.[109] Haseyeeshe, dhibaato ayaa wuxuu ka yimid qolooyinka tiro wayn oo sheeganaayo inay u dhasheen qoloyiin tiro yar si ay uga faa'ideystaan tixgelintaan gaarka ah.[110]

# Hababka wax loo xalliyo: xoojinta xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay ayadoo loo maraayo adeegyo caalam ah

Xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay muhiim uma eheyn siyaasadda Soomaaliya ee jaaliyadda caalamka. Xaaladda caadiga ah ee xadgudubka xuquuqyada insaanka lagu sameeyo beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliya mar-mar ayaa laga hadley Golaha Xuquuqda Insaanka ee Qaramada Midoobay iyo ururka ka horeeyey, Guddiga Xuquuqda Insaanka (UNCHR).[111] Hase-yeeshe, warbixinada ku saabsan Soomaaliya oo sameeyey ururyada xuquuqda insaanka caalamka wuxuu xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay siiyey tixgelin yar markii loo bar-bardhigo mawduucyada caalamka muhiim ka ah sida dhisidda nabadda ka dhaxeyso qabiillada wayn, dib-u-dhisidda dalka iyo caawinaadda samafal ee deg-degga ah. Isla markaas, mashruucyada horumarka waxaa loo qorsheeyey kooxaha 'baylaha ah' sida haweenada, carruurta, beelaha laga tirada badan yahay iyo IDP laakin si dhif ah ayaa raad gaar ah loo siiyaa beelaha laga tirada badan yahay. Dhowr ururyo uu yaqaano MRG oo u shaqeeyo beelaha laga tirada badan yahay gudaha Soomaaliya iyo Soomaaliland ayaa awood micnoowi ah ku yeeshey warbixinta xuquuqyada insaanka iyo u doodkooda, ama hawlaha samafal ama horumar ee jaaliyaddooda.

MRG wuu og yahay in horumarka caadiga ah ee nabadgelyada iyo heshiisiinta iyo ilaalinta xuquuqyada aasaasiga ah ee insaanka ay muhiim ka yihiin horumarka mustaqbalka ee xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay. Waxaa kani loola jeedaa helidda nabad ku filan, heshiis, dawlad degan iyo in sharciga qaranka oo dhan laga raaco sida laga gaarey Soomaaliland iyo qaybo ka mid ah Buntland. Xittaa aagaha dagaalka ka socdo koonfurta-dhexe ee Soomaaliya, waxaa ka jiro fursado lagu horumariyo xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay loomana baahno in si xad eheen dib loo dhigo.

Beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaliyeed waxay xaq u leeyihiin – iyo codsadaan – isla xuquuqyada sharciyeed, siyaasadeed, dhaqaale iyo hiddo oo caalamka iyo qaranka ku qabaan qolooyinka tiro wayn, kuwaaso gaar ahaan ka yimaado heshiisyada caalamka iyo goboleed ee xuquuqyada insaanka sida ICCPR, ICESCR, Xeerka Afrika ee Xuquuqda Insaanka iyo Dadyowga, iyo Golaha 111 ee ILO, ayadoo kala sooc laga sameynin heerkooda qoloyiin tiro yar, ay ku jiraan xuquuqda in kalasooc lagu sameynin hawshooda, horumarka iyo xajinta nolol-malmeedka, iyo guursadaan qofka ay doonayaan.

Waxaa kaas dheeraad u ah, si wax looga qabto xaaladda xun ay ku jiraan beelaha laga tirada badan yahay, oo sii xumeeyey muddo toban sano oo daryeel la'aan ah iyo xoog ku haynta iyo dagaalka, ICERD wuxuu Soomaaliya iyo hay'adaha ka codsanaaya inay sameeyaan tallaaboyin gaar ah, oo si ku meel gaar ah caawinaayo kooxaha u dhashey qolooyinka tiro-yar si ay u gaaraan sinnaan dhaqaale iyo bulsho.[112] Xukumada Soomaaliya waa inay ku dadaalaan si ay u hirgeliyaan shuruudyada ICERD iyo hubiyaan in qof u dhashey qolo tiro yar dib dhibbane uga noqonin midab-takoornimo ama kalasooc.

Soomaaliya wuxuu qayb ka yahay heshiisyada kor ku xusan ayadoo loo maraayo ansixida ama ka-goysiga u sameeyey dawladda ka horeeyey midka 1991, kaaso laga rabo inay raacaan dawladaha xiga inkastoo run ahaan si dhab ah loo hirgelinin.

Dawladda Qaran ee ku Meelgaarka ah ee horey waxay saxiixeen heshiiska Golaha Xuquuqda Cunugga ee 2002, oo bisha Nofeembar 2009, TFG wuxuu sheegay inuu doonaayo inuu ansixiyo. Ayagoo soo dhaaweynaayo go'aanka, Khasnadda Carruurta ee Qaramada Midoobay (UNICEF) waxay arkeen in xukunka Soomaaliland iyo Buntland, 'ay sheegeen inay ayagaba rabaan inay habkooda sharciga geliyaan sharuudyada CRC iyo xuquuqyada cunugga dhax-geliyaan xeerkooda sharciyeed, sida Xeerka Caddaalada Dhallinyarada Soomaaliland ee 2008 iyo Qaybta 19 ee Xuquuqda Carruurta ee ku qoran Dastuurka Buntland'.[113]

Heshiisyadan waa muhiim, sababtoo ah waxay muujinaayaan waajibka caalamka ee TFG markii loo eego xuquuqda insaanka, inkastoo iminka TFG uusan haysan awoodda uu ku hirgeliyo. Waxay xittaa heer fiican ee xuquuqda insaanka u noqonaayaan xukumada Soomaaliland iyo Buntland; iyo sida al-Shabaab.

Hababkaan waxay xittaa noqdeen bartilmaameed muhiim ah ee difaaceyaasha xuquuqda insaanka Soomaaliyeed ee bulshada ka shaqeeyo, iyadoo ay

xukumada ka codsadaan inay dhowraan xuquuqda insaanka dadka hoos yimaada gobolada ay xukumaan. Waxaa kaas dheeraad u ah, ururyada madaxbannaanan iyo ururyada aan dawlada qayb ka eheen waa inay xushmeeyaan heerka ugu yar ee xuquuqda insaanka calaamka, ay ku jirto xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay, haddii ay doonayaan in lagu aqoonsado sida xukun sharciyeysan ee gobolada ay xukumaan.

Hase-yeeshe Soomaaliya, qayb kama ahan heshiiska Golaha Ka-saarka Dhammaan Noocyda Kalasooca ku toosan Haweenada, ama Xeerka Rome ee Maxkamadda Caalamka ee Dembiga. Marki la eego xaaladda xun ee haweenka ku qabaan dalka, iyo awood darrada ay caddaalada ku qabto inay wax ka qabato falalka dembiyada dagaalka iyo dembiyada ka horjeeda insaanka, ansixida hababkaan caddaaladeed waa in muhiim laga dhigaa.

Bayaanka UN'ka ee Xuquuqda Dadka ka soo jeeda Qoloyiin Qaran ama Jinsi ahaan, Diin ama Luqad ahaan Tiro yar (1992) wuxuu micnoowi u yahay dhammaan beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliya, gaar ahaan qaybahan:

- Waajibka dawladda waa ilaalinta nolosha iyo aqoonsiga beelaha laga tirada badan yahay (qaybta 1) ayadoo loo maraayo hab-socodyo sharciyeed iyo habab kale oo ku habboon (qaybta 2);
- Xaqa inay si xorriyad ah ugu raaxeystaan dhaqankooda, diintooda iyo luqadooda ayadoo dhax-gal ama kalasooc lagu sameynin (qaybta 2.1);
- Xaqa in si buuxda uga qayb-galaan nolosha bulshadeed, dhaqaaleed, diimeed, dhaqameed iyo dawladeed (qaybta 2.2) iyo go'aan ka gaarka waxyaabaha khuseeya beelaha laga tirada badan yahay heer qaran ama degaaneed labaduba (qaybta 2.3);
- Xaqa ay ku sameeyaan iyo haayaan ururyadooda (qaybta 2.4) iyo xiriiryo kooxaha kale oo u dhashey beelaha laga tirada badan yahay (qaybta 2.5);
- Waajibka dawladda inuu xoojiyo xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay ayadoo kalasooc la sameynin iyo sinnaan buxa ku qaba sharciga hortiisa (qaybta 4.1), inuu sameeyo xaalad faa'ideynaayo horumarka dhaqankooda iyo diintooda iyo horumarka iyo barashada luqadahooda (qaybta 4.2), inuu dhirri-geliyo waxbarashada iyo aqonta taariikhda, hiddoyinka, luqadaha iyo dhaqanada (qaybta 4.4), in loo tixgeliyo hab-socodyo awood lagu sinaayo inay si buuxa uga qayb-galaan horumarka dhaqaale ee dalka (qaybta 4.5);
- Siyaasadaha Qaranka iyo barnaamjyada lagu hirgeliyo xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay (qaybta 5.1);
- Wada-shaqeyn ka dhexeeyo dawladaha si loo abaabulo xuquuqyadaan (qaybta 5.2, 6 iyo 7);
- Ku tabbarucida hay'adaha UN sidii si buuxa loo hirgeliyo xuquuqyadaan (qaybta 9).

# Taloyinka

## Ku socota Dawladda Federaaliga ah ee ku Meelgaarka ah (TFG) ee Soomaaliya:

- Dastuurka mustaqbalka cusub ee Soomaaliya waa inuu gaar ahaan aqoonsadaa beelaha laga tirada badan yahay ee dalka ku nool, iyo xoojiyaa xuquuqdooda sinnaanta iyo kalasooc la'aanta ayadoo la raacaayo heerarka xuquuqyada insaanka calaamka.
- Tirada wakiilnimada ka jiro baarlamaanka TFG (habka 4.5) waa in dib loo eegaa si loo hubiyo in beelaha laga tirada badan yahay wakiil ahaan uga qayb qaataan baarlamaanka si xiriir la leh tirada dadweynahooda.
- Ilaalinta xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay waa inuu ka ahaada qayb fiican xeerka ururka xuquuqda insaanka, tusaale ahaan guddi baarlamaan, wasiir mas'ul ka ah xuquuqda insaanka, ama guddiga xuquuqda insaanka madaxbannaanan.
- Waa in la sameeyaa istaratejiiyo qarameed ee beelaha laga tirada badan yahay ayadoo lala tashanaayo ururyada xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliya , hoggaamiyayaasha beelaha laga tirada badan yahay iyo kuwa kale ee ka wel-welsan xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay, gobol ahaan ama calaam ahaan.
- Hab walba ee caddaalad ku meel gaar ah, ay ku jirto guddi madaxbannaan oo baara xadgudubka xuquuqyada insaanka, habsocodyada heshiisiinta, baaritaanka dembiyada, ama barnaamajyada magdhowga, waa inay si gaar ah ugu daraan baaritaanka xadgudubka lagu sameeyey beelaha laga tirada badan yahay.
- Waa in tallaabo la qaadaa si loo ansixiyo hababka caalamka ee ilaaliyo dadweynaha baylaha ah, oo ka mid ah beelaha laga tirada badan yahay, iyo gaar ahaan ku jiro Golaha Xuquuqda Cunugga, Heshiiska ku saabsan Tirtiridda Dhammaan Noocyada Kalasooca ee loo geysto Haweenka, iyo Xeerka Rome ee Maxkamadda Caalamka ee Dembiyada.

## Ku socota Dawladda Soomaaliland:

- Boos uga helidda beelaha laga tirada badan yahay Aqalka Wakiilada Soomaaliland iyo Aqalka Sare (*Gurti*) waa in dib loo eegaa iyo wanaajiyaa si loo hubiyo wakiilnimo xaq ah.

## Ku socota Dawlad Goboleedka Buntland:

- Boos waa in beelaha laga tirada badan yahay looga helaa Baarlamaanka Buntland.
- Waa in la qabtaa baaritaan deg-deg ah oo madaxbannaan iyo eex leheen oo ku saabsan warbixinada kufsiga badan uu ciidamada, booliska iyo dadka kale ku haayaan haweenka u dhashey beelaha laga tirada badan yahay iyo kuwa kale ba ee IDP oo ku nool Boosaaso iyo aago kale ay ku yaalaan xiroyiinka IDP.

## Ku socoto TFG, Dawladda Soomaaliland, iyo Dawlad Goboleedka Buntland:

- Waa in la ballanqaada in la taageero xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay kaaso la socda xuquuqyada insaanka kale ee lagama marmaanka ah, ayadoo loo kaashanaayo habab ku haboon oo lagu abaabulo iyo xoojiyo xuquuqyadaan sida uu qabo heerka xuquuqyada insaanka caalamka.
- Waa in la taageera xaq u lahaanshada xorriyad ra'yi-bixin, wax-sheegid iyo urur ka noqodka ururyada xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay iyo halganayaasha, iyo xuquuqda in beelaha laga tirada badan yahay ay raacaan iyo ilaaliyaan dhaqankooda, diintooda iyo luqaddooda.
- Waa in la abaabulaa ka qayb-galka qolooyinka tiro-yar nolosha shacbiga, ay ku jirto wakiilanimadooda adeegga dadweynaha, qaybaha dawladda, caddaalada, ciidamada booliska iyo badbaadinta iyo waa in la raadiyaa tallaaboyin xoojin karo.
- Helitaanka siman ee caddaalada xubinada beelaha laga tirada badan yahay waa in la hubiyaa, ay ku jirto waxbarashada shacbiga iyo tababar sidii garsoorayaasha, booliska iyo xeer-ilaaliyayaasha iyo qareenada u bartaan mawduucyada xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay iyo heerarka iyo ku hirgelintooda habka caddaalada.
- Barnaamajyo waxabarasho shacbi waa in la sameeyaa si looga hortago naceebka, kalasooca ku toosan shakhsiyaadka ama jaaliyadaha taaso ku salaysan heerkooda qolooyin tiro yar.
- Hab-socodyo gaar ah waa in la hirgeliyaa si loo ilaaliyo iyo dhirrigeliyo xuquuqda haweenada ka socdo jaaliyadaha tiro yar, oo dhibaane ka ah kalasooc badan ee xiriir la leh jinsigooda ama ka socodka dhinac qoloyin tiro yar.

### Ku socoto dhammaan ciidamada hubeysan ee ka hawlgala Soomaaliya:

- Ciidamada badbaadada Soomaaliya, Ergada Midowga Afrika ee Joogto Soomaaliya, ciidamo caalam oo kale, iyo qolooyinka hubeysan ee dawladda ka soo horjeeda ay ku jiraan al-Shabaab, waa inay mar walba xushmeeyaan Qaybta 3 ee heshiiska Golaha Geneva iyo sharciyada aasaasiga kale ee calaamka ee khuseeya xuquuqyada insaanka oo ilaaliyo shacbiga iyo dadka kale ee aan dagaalamin markii ay jiraan dagaalada sokeeye.

### Ku socota UN, AU iyo hay'adaha caalamka ee horumarka:

- Xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay waa in la dhexgeliyaa gargaarka caalamka iyo labada dhinac ee la siiyo Soomaaliya iyo Soomaaliland, ay ku jirto UN/Dib-u-dhisidda Bankiga Adduunka iyo qorshaha Horumarka Qaab-dhismeedka.
- Hay'adaha caalamka ee ka shaqeeyo Soomaaliya ay ku jiraan, OCHA, UNDP, UNHCR, UNICEF iyo WFP, waa inay hubiyaan in beelaha laga tirada badan yahay lagu daro qorshooyinka iyo barnaamijyada samafalka ee qeybo walba, iyo in hab-socodyada gaarka ah ama barnaamjyada gaar ahaan loo sameeyey la hirgeliyo si loo gaaro dadweynaha u dhashey beelaha laga tirada badan yahay ee dhibato ah in la gaaro. Gargaarka samafalka waa inuu ku salaysan yahay, markii uu suurtogal yahay, aruurinta maclumaadka aan isku meel yiilin ee khuseeyaa beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliya; kala qaybinta samafalka waa in si soke loo ilaaliyaa; iyo waa in la baaraa eedeyn walba oo ku saabsan xattooyada ama meel kale u gudbinta caawinaadda samafalka loogu talagalay beelaha laga tirada badan yahay. UNHCR waa inuu isku-duwaa hab-socod deg-deg ah si uu u hubiyo xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay ee IDP, kaaso mudnaansho la sinaayo barnaamajyada ilaalinta gaarka ah ee kufsiga gabdhaha iyo haweenada joogo xiroyiinka IDP, gaar ahaan Boosaaso.
- Beesha caalamku waa in ay taageero ka bixiso ballaarinta shaqada Soomaaliya uu ka wado Xafiiska Madaxa guddiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Insaanka si loogu daro barnaamij gaar ah oo loogu talagalay xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay, kaasoo barbar socda kaalinta Khabiirka Madaxbannaan ee Soomaaliya u xilsaaran, waana in ay taageero ka bixiso waxqabadka caalamiga ah iyo goboleed ee lagu abaabulayo xuquuqda beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliya iyadoo loo sii maro tusaale ahaan Golaha Xuquuqda Insaanka ee Qaramada Midoobay iyo Guddiga Xuquuqda Insaanka iyo Dadyowga ee Afrika.
- Deeq-bixiyayaasha waa inay taageeraan dhisidda awoodda Shirkadaha Samafalka Soomaaliya ka shaqeeyo iyo ururyada ku saleysan jaaliyadaha u dhashey beelaha laga tirada badan yahay ee ka shaqeeyo dalacsiinta xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay, iyo ka qayb-geliyaan barnaamijyada taageerida ilaaliyayaasha xuquuqda insaanka dadka difaaca xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay, markii la fulinaayo Bayaanka Ilaaliyayaasha Xuquuqda Insaanka ee UN iyo EU.
- Deeq-bixiyayaasha caalamka waa inay sameyaan barnaamajyo horumar waxbarasho, shaqo-gelin iyo nolol-maalmeed ku toosan iyo caawiyo baahida jaaliyadaha u dhashey beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliya.

### To countries of asylum:

- Dalalka marti-galiyaha ah waa inay tixgeliyaan caddibaadka joogtada ah ee baaxadda leh oo lagu sameeyo beelaha laga tirada badan yahay markii la tixgelinaayo heerka qaxootinimo ee magangalyo-doonka Soomaalida u dhashey beelaha laga tirada badan yahay.
- Dhammaan dalalka waa inay raacaan mabdada *dib u celin la'aanta* qaxootida; waa in xaalad walba ha ahaate Soomaaliya loo celinin magangalyo-doonka u dhashey qolooyin tiro yar.

# Lifaaqa A: Habka Cilmi-baariska

Ayadoo dheeraad u ah sahaaminta wararka daraasadeed iyo warar kale ku saabsan beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliyeed iyo aasaaska siyaasadeed ee xiriirka la leh, MRG wuxuu labo cilmi-baare ka codsadey inay soo aruuriyaan warar khuseeya xaaladda ay iminka ku sugan yihiin beelaha laga tirada badan yahay ayagoo kala barka bisha 2009 u booqdey aagaha ay beelaha laga tirada badan yahay degan yihiin iyo si nabad ah lagu wareysan karo, iyo sidoo kale wareysi telefoon waxay qabteen horraantii 2010.

Labada cilmi-baare waxay ahaayeen Soomaali (hal dheddig iyo hal rag ah) oo xirfad wayn ku lahaa la shaqeynta shirkadaha samafalka Soomaaliya iyo Soomaaliland, ay ku jirto mawduucyada xuquuqyada beelaha laga tirada badan yahay, iyo yaqaano ururyada caalamka iyo Soomaliyeed ee ka shaqeeyo Nairobi, oo ay ayagaba joogeen.

Dadka la wareystey waxaa ka mid ah xubinada beelaha laga tirada badan yahay, ururyada caalamka iyo degaanka, iyo xubinada qabiillada wayn. Si fiican ayaa loo wareystey (badanaa af Soomaali) ayadoo la isticmaalaayo wareysi habeysan ee shakhsi ahaan ama koox ahaan looga sameeyey Hargaysa iyo Gabiley ee Soomaaliland, iyo Boosaaso ee Buntland, qiyaas ahaan hal toddobaad ayaa wareysiga laga qabtey meel walba, bisha Juunyo 2009, iyo Nairobi kala barka 2009, gaar ahaan xaafadda ay Soomaalida degan yihiin ee Eastleigh. Ballanqaad sir-hayn ayuu MRG baxshey inuu magacaabin doonin dadka warka siiyey cilmi-baarisyada si loo ilaaliyo ammaankooda.

Maadaama uu watigaas dagaal jirey, cilmi-baarisyada way awoodi waayeen inay u booqdaan koonfurta-dhexe ee Soomaaliya. Kani wuxuu ahaa wax nasiib xumo ah iyo wax xad ka noqdey hawshooda, iyo aag wayn ay beelaha laga tirada badan yahay degan yihiin ayuu ka dhigey cilmi-baaris la'aan (gaar ahaan meesha ay degan yihiin Bantuda). Markhaati dheeraad ah ayaa aagahaas laga aruuriyey Maarso 2010 ayadoo la isticmaalaayo telefoon iyo email.

# Lifaaqa B: Qaamuus-yare

**AMISOM:** Midowga Afrika 'ciidan taageero nabadda' Soomaaliya iyo garabsiiyo TFG laga bilaabo 2002, oo halkaas ku leh 5,200 ciidan ka socdo Uganda iyo Burundi sanadka 2010.

**Bantuda:** beelaha laga tirada badan yahay oo ugu wayn, ka kooban beer-abuureyaal oo caadi ahaan ku noolaa aagaha beeraha koonfurta Soomaaliya oo ka dhexeeya webiyada Jubba iyo Shabeelle. Waxaa af Soomaali lagu magacaaba *Jareer* ('timo adag'), kaaso lagu tilmaamaayo jinsigooda iyo dhaqankooda Afrikaanka.

**Banaadiri:** koox ka kooban qolo tiro yar kuna nool 'xeebaha' Soomaaliya iyo jinsi ahaan ka socdo dalalka Carabta iyo la leh dhaqan hiddo iyo Muslim Soomaalida; waxaa ka mid ah *Reer Xamarka* (ku nool Muqdisho iyo gobolka Banaadir), *Baraawani* (ku nool Baraawe), kuwo kalena waxay degan yihiin Marka iyo magaaloyin ku yaalo xeebta iyo gudaha dalka, iyo *Bajuni* oo ah kallumeyste ku nool agagaarka dekadda Kismaayo iyo jasiiradaha u dhow.

**Daarood:** qabiilka ugu wayn.

**Dir:** qabiil wayn, oo ka kooban qabiillada koonfurta Soomaaliya sida Biyamaal, iyo Isaaq ee Soomaaliland, inkastoo uu Isaaq caadi ahaan kani diidan yahay.

**Gabooye:** magaca caadi ahaan dadka ku nool Soomaaliland ku magacaabaan qabiillada yar ee Madhibaan iyo Musse Deriyo, taariikh ahaan lagu magaacibi jirey Midgaan.

**Hawiye:** qabiil wayn ee degan magaalo-madaxa Muqdisho agagaarkiisa Ciidamada ururka Shir-waynaha Midoobey ee Soomaaliya (USC) oo 1991 af-gambiyey dawladda Siad Barre wuxuu ka koobnaa xubinada qabiilka Hawiye.

**Qofka Gudaha Dalka ku Barakacay ama IDP:** qof ku barakacay gudaha dalkiisa, wuu ka duwan yahay qaxooti ama magangalyo-doon oo u baxsadey dal kale.

**Maxkamadaha Midowga Islaamiga** (ICU) – oo xittaa lagu yaqaano magacyo kale sida Midowga Maxkamadaha Islaamiga ah): horey u ahaan jirey koox Islaami ah oo hubeysan ee ka soo horjeedo TFG, kadib noqdey qaybta dhexe ee Isbaaheysiga Dib-u-xorreynta Soomaaliya (ARS) oo joogey Eritrea. Qaybta ARS ee joogey Jabuuti ayaa ku biirey TFG ka dib markii heshiiska la qabtey 2008 iyo hoggaamiyaha ICU, Sheikh Sharif Sheikh Ahmed, ayaa markaa 2009 TFP ku magacaaben Madaxweynaha Soomaaliya.

**Isaaq:** qabiilka ugu wayn ee Soomaaliland iyo magaalo-madaxdiisa Hargaysa. Ciidamada Dhaqdhaqaaqa Qaranka Soomaaliyeed (SNM) oo ka xoog-badiyey ciidamada Xukunkii Siad Barre dagaaladi 1991 ka dhacey gobolka waqooyi-galbeedka, wuxuu ka koobnaa xubinada qabiilka Isaaq.

**Jareer:** eeg Bantuda.

**Madhibaan:** magaca badanaa malmahaan Soomaaliya (ay ku jirto Buntland) lagu aqoonsado beelaha laga tirada badan yahay ee Midgaanta, inkastoo rasmi ahaan lagu tilmaamo hal qayb ka mid ah Midgaan/Gabooye, qaybta kale waxaa lagu magacaaba Musse Deriyo.

**Qolooyinka tiro badan:** afarta qabiil Soomaaliyeed ee 'bilis' ee u badan (oo xittaa lagu yaqaano laf-qabiil ama qoys-qabiil) – kooxo abtirsanaayo iyo sheegi karo tafiirta ay isla wadaagaan.

